# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# GOLAHA WAKIILLADA

## XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA
## XEER LR. 01/2021

# TUSMADA XEERKA


**CUTUBKA 1_AAD** ........ 8

**GOLAHA WAKIILLADA EE SOMALILAND** ........ 8

QODOBKA 1AAD ........ 8
EREY BIXIN ........ 8
QODOBKA 2AAD ........ 11
TILMAAMAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILLADA SOMALILAND ........ 11
QODOBKA 3AAD ........ 11
AWOODAHA GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND ........ 11
QODOBKA 4AAD ........ 12
DHAARTA XILDHIBAANNADA ........ 12

**CUTUBKA 2_AAD** ........ 13

**ISUGU YEEDHIDDA XUBNAHA CUSUB IYO DOORASHADA GUDDOOMIYAHA IYO KU XIGEENNADA** ........ 13

QODOBKA 5AAD ........ 13
FADHIGA UGU HORREEYA EE GOLAHA WAKIILLADA CUSUB ........ 13
QODOBKA 6AAD ........ 13
QAABKA LOO DOORANAYO GUDDOOMIYAHA GOLAHA IYO LABADDIISA KU-XIGEEN ........ 13

**CUTUBKA 3_AAD** ........ 15

**GUDDOONKA, XAFIISKA IYO GUDDIYADA GOLAHA** ........ 15

QODOBKA 7AAD ........ 15
QAAB-DHISMEEDKA GOLAHA ........ 15
QODOBKA 8AAD ........ 16
AWOODAHA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA ........ 16
QODOBKA 9AAD ........ 17
AWOODAHA GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA GOLAHA WAKIILLADA ........ 17
QODOBKA 10AAD ........ 18
XIL-WAAYIDA GUDDOOMIYAHA & KU-XIGEENADIISA ........ 18
QODOBKA 11AAD ........ 20
XILKA XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WKIILADA ........ 20
QODOBKA 12AAD ........ 21
XILKA XOG-HAYE KU-XIGEENKA ........ 21

**CUTUBKA 4_AAD** ........ 21

**MUDANAYAASHA GOLAHA WAKIILADA** ........ 21

QODOBKA 13AAD ........ 21
XILKA MUDANAYAASHA GOLAHA WAKIILADA ........ 21
QODOBKA 14AAD ........ 22
XUQUUQDA MUDANAYAASHA GOLAHA ........ 22
QODOBKA 15AAD ........ 23
MAAMUUSKA IYO XASAANADDA MUDANAYAASHA GOLAHA ........ 23
QODOBKA 16AAD ........ 23
KA XAADIRIDDA FADHIYADA GOLAHA ........ 23
QODOBKA 17AAD ........ 25
LABISKA IYO HAYBADA MUDANE ........ 25

Qodobka 18aad ........ 25
Waayida Xubinnimada Golaha wakiilada ........ 25

**CUTUBKA 5_AAD ........ 25**

**MADAXWEYNAHA ........ 25**

Qodobka 19aad ........ 25
Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada ........ 25
Qodobka 20aad ........ 26
Eedaynta iyo Maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa ........ 26

**CUTUBKA 6_AAD ........ 26**

**KALFADHIYADA IYO FADHIYADA GOLAHA WAKIILADA ........ 26**

Qodobka 21aad ........ 26
Kal-fadhiyada iyo Fadhiyada Golaha Wakiillada ........ 26
Qodobka 22aad ........ 26
Kal-fadhiyada Aan Caadiga Ahayn Ee Golaha ........ 26
Qodobka 23aad ........ 27
Ajendaha Golaha ........ 27
Qodobka 24aad ........ 27
Guntanka (Quorum) ........ 27
Qodobka 25aad ........ 27
Noocyada Codaynta. ........ 27
Qodobka 26aad ........ 28
Habka Doodda iyo Anshaxa xubnaha ........ 28
Qodobka 27aad ........ 29
Dhexgal Toosineed (Points of Order) ama Sixitaan (point of correction) ........ 29
Qodobka 28aad ........ 30
Hadal Jeedinta Wasiirada & Madaxda kale ........ 30
Qodobka 29aad ........ 31
Amniga Golaha Wakiilada ........ 31
Qodobka 30aad ........ 32
Kaydinta & Xafidaadda Hadal-qoraalka Kalfadhiyada Golaha ........ 32
Qodobka 31aad ........ 33
Xushmada Istaaga Golaha ........ 33
Qodobka 32aad ........ 33
Nidaamka Fadhiyada Golaha ........ 33

**CUTUBKA 7_AAD ........ 33**

**HABKA ANSIXINTA XEERARKA ........ 33**

Qodobka 33aad ........ 33
Soo Bandhigida Mashruuc Sharci ........ 33
Qodobka 34aad ........ 34
Habka Mashruuc Sharci Marayo ........ 34
Qodobka 35aad ........ 36
Heerka Guddiyada Golaha (Committee Stage) ........ 36
Qodobka 36aad ........ 36
Waajibaadka Guddi Hoosaadka Golaha ee habraaca Mashruuc Sharci ........ 36
Qodobka 37aad ........ 37
Doodda Gole Weynaha ee mashruuc sharci ........ 37
Qodobka 38aad ........ 38

Akhriska 2aad ee mashruuc sharci ........ 38
Qodobka 39aad ........ 39
Xeerarka Madaxweynuhu Soo Celiyo ........ 39
Qodobka 40aad ........ 39
Habka dhaqan gelinta mashruuc sharci la o golaaday ........ 39
Qodobka 41aad ........ 39
Mashruuc Sharciyadda La diiday ........ 39
Qodobka 42aad ........ 40
Mooshinada (Motions) ........ 40
Dabeecadda Guud Ee Mooshinada (Motions) ........ 40
Qodobka 43aad ........ 40
Habka Codsiga iyo Noocyada Mooshinada ........ 40
Qodobka 44aad ........ 41
Wargelinta Mudanyaasha ........ 41

**CUTUBKA 8_AAD ........ 41**

**GUDDIYADA ........ 41**

Qodobka 45aad ........ 41
Guddi Hoosaadyada Golaha ........ 41
Qodobka 46aad ........ 42
Waajibaadka Shaqo ee Gudiyadda Golaha Wakiiladda ........ 42
Qodobka 47aad ........ 43
Qaab-dhismeedka Guddi-hoosaadka ........ 43
Qodobka 48aad ........ 43
Kulamada Guddi-hoosaadyada ........ 43
Qodobka 49aad ........ 44
Kulamada Xidhan ee Guddida ........ 44
Qodobka 50aad ........ 44
Ajendaha kulanka Guddida ........ 44
Qodobka 51aad ........ 44
Shaqaalaha Guddiyada ........ 44
Qodobka 52aad ........ 44
Tirada Guddi hoosaadyada Golaha ........ 44
Qodobka 53aad ........ 45
Guddi Hoosaadyada Gaarka ah ........ 45
Qodobka 54aad ........ 45
Guddida Joogtada iyo Anshaxa ........ 45
Qodobka 55aad ........ 46
Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca ........ 46
Qodobka 56aad ........ 46
Guddida Hawlaha Golaha (Business Committee) ........ 46
Qodobka 57aad ........ 47
Guddida Siyaasada Arrimaha Debedda, Iskaashiga Caalamiga Ah, Qorsheynta iyo Maalgashiga .. 47
Qodobka 58aad ........ 47
Guddida Arrimaha Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamarta, ........ 47
Qodobka 59aad ........ 48
Guddida Garsoorka, Cadaaladda, Shuruucda Iyo Xuquuqda Aadanaha ........ 48
Qodobka 60aad ........ 48
Guddida Ilaalinta Iyo Daryeelka Hantida Qaranka ........ 48
Qodobka 61aad ........ 49
Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ........ 49

Qodobka 62aad ........ 50
Guddida Hawlaha Guud Iyo Gaadiidka, Guriyeynta iyo Tiknoolajiyadda ........ 50
Qodobka 63aad ........ 50
Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska ........ 50
Qodobka 64aad ........ 51
Guddida Arrimaha Bulshada ........ 51

**CUTUBKA 9_AAD ........ 51**

**KORMEERIDA XUKUUMADA ........ 51**

Qodobka 65aad ........ 51
U yeedhidda Masuuliyiinta Qaranka ........ 51
Qodobka 66aad ........ 52
Maamulka Guud ee Golaha Wakiilada ........ 52
Qodobka 67aad ........ 52
Ku dhawaaqida Xaaladda Deg-dega ah ........ 52
Qodobka 68aad ........ 52
Wax ka-bedelka Xeer Hoosaadka Golaha Wakiillada ........ 52
Qodobka 69aad ........ 52
Buuxinta Jagada Golaha Wakiilada ........ 52
Qodobka 70aad ........ 53
Dhamaadka Mudada Golaha Wakiilada ........ 53
Qodobka 71aad ........ 53
Habka Loo Raacayo Kala dirista Golaha Wakiilada ........ 53
Qodobka 72aad ........ 53
Laalis ........ 53
Qodobka 73aad ........ 53
Dhaqangalka Xeer-hoosaadka ........ 53

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
Head Quarter Hargeisa.

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha wakiilada**
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-01/896/2021

Date: 25/08/2021

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada Xeer Lr. 01/2021**

**GOLAHA WAKIILADDU**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay**: | Qodobada 9aad, 38aad, 39aad, 40aad, 41aad, 42aad, ilaa 56aad, 74aad, 79aad ee Dastuurka JSL |
| **Markuu Ogaaday**: | Baahida uu Golaha cusubi u qabo inuu samaysto Xeer- hoosaad cusub |
| **Markuu Arkay**: | In ay Jamhuuriyada Somaliland qaadatay nidaamka habka ku dhisan Tallo wadaaga iyo dimuquraadiyada aan ka hor imanayn Shareecada Islaamka |
| **Markuu Xaqiiqsaday**: | In Golaha Wakiilada JSL ku yimi Doorasho toos ah, xalaal ah ayna Waajib tahay inay hawlahooda u gutaan hab aan muran iyo mugdi geli Karin |
| **Markuu Dhagaystay**: | War-bixintii Guddidii loo xilsaaray soo diyaarinta Xeer- hoosaad cusub |
| **MarkuuDhagaystay**: | Doodii Mudanayaasha Golaha cusub ee Xeer-hoosaadka |
| **Markuu U Codeeyey**: | Ansixinta Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada **Xeer Lr. 01/2021 Kal-fadhiga 1aad ee Fadhigiisi 7aad** taariikhduna ahayd **25/08/2021** oo ay goob joog ahaayeen **(76)** Mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakiilada. |

Website: www.somalilandparliament.net

# Wuxuu

Cod aqlabiyad ah oo Todobaatan **(70 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada Xeer Lr. 01/2021,**halka **(4)** mudane diideen,hal **(1)** mudane-na ka aamusay, ,**Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

C/risaaq Khaliif Axmed
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL.

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

## CUTUBKA 1_AAD
## GOLAHA WAKIILLADA EE SOMALILAND

### Qodobka 1^aad^
### Erey bixin

| | |
|---|---|
| **Dastuurka:** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Qaranka ee JSL. |
| **Madaxweyne:** | Waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Qaranka Jamhuuriyada Somaliland. |
| **Madaxweyne ku-xigeen:** | Waxaa loola jeedaa Madaxweyne ku-xigeenka JSL |
| **Xeer-hoosaad:** | Waxaa loola jeedaa Xeer u gaar ah Golaha Wakiilada oo qeexaya sida Goluhu u gudanayo xilkiisa iyo awoodaha Dastuurka iyo Xeerarku u jideeyeen. |
| **Guddoomiye: (Speaker)** | Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada |
| **Guddoomiye ku- xigeen:** | Waxaa loola jeedaa Guddoomiye ku xigeenka 1aad ama ka 2aad ee Golaha Wakiilada. |
| **Shir-gudoon:** | Waxaa loola jeedaa Gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen |
| **Wasiirada:** | Waxaa loola Jeedaa xubnaha Golaha Wasiirada ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Ajende:** | Waxaa loola jeedaa qorshe hawleedyada Fadhiyada Golaha iyo Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada. |
| **Cod qarsoodi ah:** | Waxaa loola jeedaa Codeynta mudanayaashu ku dhiibtaan si qarsoodi ah. |
| **Cod Gacan Taag ah:-** | Waxaa loola jeedaa Codeynta aan qorsoodiga aheyn ee mudanayaashu dhiibtaan. |
| **Qolalka Shirarka:** | Waxaa loola jeedaa qol-weynaha (main hall) shirka ee Golaha iyo Qolalka kale ee Guddiyadu ku shiraan. |
| **Guddi-hoosaad:** | Waxaa loola jeedaa Guddiyo Golaha laga dhex magacaabay oo hawl gaar ah u qaabilsan Golaha. |
| **Guddida hawlaha Golaha** | Waxaa loola Jeedaa Guddida ay ku jiraan dhammaan Guddoomiye-yaasha Guddi Hoosaadyada, Guddoomiyaha |

| | |
|---|---|
| **(Business Committee):** | Golaha, labada Guddoomiye ku xigeen iyo Xoghayaha Guud. |
| **Go'aan:** | Waxaa loola jeedaa wax kasta oo markii loo codeeyey aqlabiyada Goluhu ku ansixiyey. |
| **Kal-fadhi:** | Waxaa loo jeedaa mid ka mid ah saddexda kal-fadhi ee Dastuurku waajibiyey inay Golaha Wakiiladu sannadkii fadhiistaan. |
| **Fadhi (Sitting):** | Waxaa loola jeedaa kulan kasta oo kooramkiisu u dhamaystiran yahay kuna furma hab waafaqsan xeer-hoosaadka Golaha. |
| **Fadhi Guddi:** | Waxaa loola jeedaa fadhiyada ay yeeshaan xubnaha Guddi-hoosaadyada Golaha ee kooram ku furma. |
| **Fadhi Xidhan:** | Waxaa loola jeedaa fadhiyada aan loo ogolayn shaqaalaha Golaha, dhegaystayaasha, saxaafadda iyo martida kale. |
| **Fadhi Furan:** | Waxaa loola jeedaa fadhiyada Golaha ee dhegaysigiisa ay ka qayb-geli karaan dadweynaha, martida kale iyo saxaafaddu. |
| **Fadhi gaar ah:** | Waxaa loola jeedaa fadhiga ugu horeeya ee Golaha Wakiilada cusub**.** |
| **Fadhi wada-jir ah:** | Waxaa loola jeedaa fadhiyada ay labada Gole (Guurtida iyo Wakiiladu) ay wada jir u fadhiistaan |
| **Xoghaynta Golaha:** | Waxaa loola jeedaa shaqaalaha Golaha Wakiilada ka shaqeeya oo uu hormoodka u yahay Xoghayaha Guud. |
| **Hadal-qoraal:** | Waxaa loola jeedaa qoraal xoghayntu ka reebto dooddaha, go'aamada, baaqyada, iwm ee Golaha ka soo baxa. |
| **Soojeedin Mashruuc-sharci:** | Waxaa loola jeedaa soo jeedin Xeer qabyo ah oo u furan dood iyo wax ka bedel (Bill of Law). |
| **Kooram:** | Waxaa loola jeedaa tirada xubnaha mudaneyaasha Goluhu sifo sharci ah uu ugu furmi karo fadhi Gole, waxaana ugu yar tirada guud ee Golaha badh-keed iyo hal marka laga reebo kuraasta bannaanaashahooda la baahiyey. |
| **Mudaneyaasha Cusub:** | Waxaa loola jeedaa mudaneyaasha ku yimi doorasho guud oo toos ah (general election) oo dimuquraadi ah |

| | |
|---|---|
| **Mudane:** | Waxaa loola jeedaa xubin ka tirsan Golaha Wakiilada (lab/dhedig). |
| **Xuquuqda Mudanaha:** | Waxaa loola jeedaa dhawr-sannaanta iyo xuquuda mudanayaasha ee ku xusan Qodobka 49aad ee Dastuurka JSL |
| **Maamuuska iyo Xasaanad:** | Waxaa loola jeedaa maamuuska iyo xasaanada mudanayaashu leeyihiin ee ku xusan Qodobka 49aad ee Dastuurka JSL |
| **Khudbad Sannadeed:** | Waxaa loola jeedaa Khudbad Sannadeedka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland ka jeediyo kal-fadhiga ugu horeeya sannad walba sida ku xusan Qodobka 46$^{aad}$ F/4$^{aad.}$ ee Dastuurka. |
| **Soo jeedin:** | Waxaa loola jeedaa soojeedin rasmi ah oo uu soo jeediyo mudane ama mudaneyaal si looga doodo go'aana looga gaadho. |
| **Toosin (Point of Order):** | Waxaa loola jeedaa soo dhex-gelida hadal mudane wato si loo saxo ama loo waafajiyo sharciga oo keliya. |
| **Aqlabiyad fudud (Simple Majority):** | Waxaa loola jeedaa codka lagu ansixiyo haldheeri, ee tirada kooramka mudanayaasha fadhiya**.** |
| **Aqlabiyad Buuxdda (Absolute Majority):** | Waxaa loola jeedaa codka lagu ansixiyo kala badh iyo hal tirada guud ee xubnaha guud ee Golaha, marka laga reebo kuraasta bannaanaashahooda la baahiyey |
| **Aqlabiyadda Golaha (2/3):** | Waxaa loola jeedaa Codka lagu ansixiyo Saddex meelood laba meelood (2/3) ee tirada guud ee Golaha Wakiilada. |
| **Xuduudda Golaha:** | Waxaa loola jeedaa dhamaan dhulka uu ku fadhiyo Goluhu, ayna ka mid yihiin barxada Golaha, madasha fadhiya Golaha (chamber), qolalka Guddiyada iyo dhamman Xafiisyada kale ee Golaha. |
| **Mudanaha Ugu Da'da Weyn:** | Waxaa loola jeedaa mudanaha ugu da'da weyn ee Guddoomiyaha maxkamadda sare xaqiijiyay. |

## Qodobka 2aad
## Tilmaamaha Guud Ee Golaha Wakiillada Somaliland

Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa tilmaamaha ku xusan Qodobka 39aad ee Dastuurka JSL oo u dhigan sidan:

B. Golaha Wakiiladu waa xubno ka wakiila dadweynaha, waana qaybta 1aad ee Xeer Dejinta dalka, ansixinta xeerarka, ongolaanshaha iyo ilaalinta siyaasadda guud ee hogaaminta dalka.

## Qodobka 3aad
## Awoodaha Golaha Wakiilada Somaliland

Goluhu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

1. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in ay fuliyaan dhammaan awoodaha uu siiyey Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka..
2. Ansixinta, wax-kabedelka ama diidmada mashruuc sharci la hor keenay.
3. Curinta mashruuc sharciyeed, hubinta iyo dhawrista xeerarka
4. Ansixinta miisaaniyad sannaddeedka iyo xisaab-xidhkeeda sida ku xusan Qodobka 55aad Farqadiisa 7aad ee Dastuurka Qaranka.
5. Curinta iyo wax-kabedelka Xeer-hoosaadka Golaha iyo ansixintiisa.
6. Doorashada Guddoomiyaha Golaha Wakiillada iyo ku-xigeennadiisa (1aad iyo 2aad) iyo xil ka qaadistooda.
7. Eedaynta iyo soojeedinta Maamuus ka-xayuubinta Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka sida ku xusan Qodobka 96aad ee Dastuurka.
8. Ansixinta ama diidmada Wasiirrada, Wasiir-dawlayaasha, Wasiir Ku-xigeennada Madaxda Hay'addaha ee qodobka 113aad ee Dastuurku jideeyey iyo madaxda kale ee qaranka ee Dastuurku ama xeer kale jideeyey ansixintooda.
9. Dabagalka, la xisaabtanka iyo u kuur-gelidda Hay'addaha dawlada si loo hubiyo fulinta Xeerarka.
10. U yeedhidda Xubnaha Golaha Wasiirada, Hay'addaha Madaxa bannaan, Komishanada iyo Guddiyada Qaranka.
11. U kuur gelidda Dhaqan-gelinta Dastuurka iyo Xeerarka kale ee wadanka u yaal

12. Soojeeddinta Wax-ka bedelka (amendment) Dastuurka sida ku xusan Qodobka 126aad ee Dastuurka JSL.
13. Dhisidda Guddiyo gaar ah (Adhoc Committees).
14. Ansixinta heshiisyada xukuumadu gasho ee khuseeya arrimaha Siyasadda, Dhaqaalaha iyo Nabad-gelyada.
15. Ka doodista iyo ansixinta mashruuc sharci ee ay soo gudbiyaan Xukuumaddu, Guurtidu iyo Shan kun oo muwaadin (5,000) ama ay keenaan mudanayaal Golaha ka tirsani. Si waafaqsan Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka.
16. Kala qayb-galka Golaha Guurtida fadhiyada Dastuurku jideeyey.
17. Golaha wakiiladu wuxuu u gudbinayaa Golaha Xukuumadda talooyin iyo tilmaamo ku saabsan hogaaminta siyaasadda guud ee dalka.
18. Sida waafaqsan Qodobka 53aad farqadihiisa 6aad iyo 7aad ee Dastuurka Qaranka, Guddiyada Golaha Wakiiladu waxay awood u leeyihiin in ay wasiirada ama Madaxda Hay'addaha dawladda ama Madaxda sare ee kale ee Qaranka oo hawshoodu khusayso ay wax ka weydiiyaan gudashada xilkooda, xogta ay ka helaan iyo soo jeedintoodana Golaha ay hor-keenaan.
19. Jideynta canshuuraha iyo talaabooyinka kale ee kor loogu qaadayo dakhliga.
20. Oggolaanshaha ama diidmada xaalada deg-dega ah (State of Emergency), ka dib marka ay soo jeediso Xukuumadu.

## Qodobka 4aad
## Dhaarta Xildhibaannada

Xubin kasta oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiilada inta aanu xilka qaban waxa uu marayaa/maraysaa dhaarta ku xusan qodobka 129aad ee Dastuurka Qaranka oo ah sidan:

**(*WAXAAN ILLAAHAY UGU DHAARTAY INAAN U NOQONAYO DAACAD DIINTAYDA ISLAAMKA AH, DALKAYGA SOOMAALILAND, DADKIISANA KU MAAMULAYO SINNAAN IYO CADDAALAD*).**

## CUTUBKA 2_AAD

## ISUGU YEEDHIDDA XUBNAHA CUSUB IYO DOORASHADA GUDDOOMIYAHA IYO KU XIGEENNADA

### Qodobka 5aad
### Fadhiga Ugu Horreeya Ee Golaha Wakiillada Cusub

1. Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Wakiillada cusub waa fadhi gaar ah wuxuuna qab-soomayaa maalinta Madaxweynuhu u muddeeyo, soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo maalintii ay Maxakamadda sare ku dhawaaqday natiijadii doorashada ama maalinta shan iyo afartanaad (45) oo xubnaha Golaha cusubi iskood isugu yimaaddaan, kana soo qaybgalaan fadhigaa 42 xubnood ugu yaraan tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiilada ee cusub.
2. Fadhiga xubnaha Golaha Wakiilada ee cusub waxaa furaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo isla maalintaana dhaarinaya xubnaha Golaha Wakiilada ee cusub.
3. Dhaartu waxay noqonaysaa mid mid ama gobol gobol waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
4. Xubina (member) ma codayn karto iyada oon la dhaarin.
5. Dhaarta ka dib, Shirka waxa Guddominaya mudanaha ugu da'da weyn xubnaha Golaha cusub, waxana lagu dooranayaa isla fadhiga maalintaas Guddoomiye iyo laba Guddoomiye ku xigeen.
6. Shirka waxaa Guddoominaya mudanaha ugu da'da weyn, haddii mudanaha ugu da'da weyni yahay musharax waxa shirka Guddoominaya mudanaha ku xiga da'ahaan haddii aanu musharax ahayn, haddii uu isna uu musharax yahay waxaa guddoominaya xubinta da'ahaan ku soo xigta waxaana sheegaya Guddoomiyaha Maxakamadda Sare.

### Qodobka 6aad
### Qaabka Loo Dooranayo Guddoomiyaha Golaha iyo Labaddiisa Ku-xigeen

1. Si waafaqsan Dastuurka, xubinta ugu da'da weyn Golaha ayaa Shirguddoominaya doorashada Guddoomiyaha iyadoo la tix-raacayo qodobka 5aad farqadiisa 6aad ee Xeer-hoosaadka.
2. Marka la doorto Guddoomiyaha Golaha, Guddoomiyaha ayaa shirgudoominaya doorashada ku xigeenadiisa.

3. Guddoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxaa cod gacan-taag ah oo aqlibiyad hal dheeri ah ku dooranaya xubnaha Golaha wakiilada.
4. Marka ay bannanaato jagada Guddoomiyaha, xilka waxaa sii wadaya ku-xigeenka 1aad, Goluhuna shaqo kale ma qaban karo ilaa uu doorto Guddoomiye, taas oo ku dhacaysa 7 maalmood gudahood haddii uu kalfadhigu furan yahay, Haddii kal-fadhiga xidhan yahayna fadhiga ugu horeeya ee kal fadhiga xiga ayaa lagu dooranayaa.
5. Guddoomiye ku xigeenka 1aad waxa uu Golaha waydiinayaa mudanayaasha u sharaxan jagada Guddoomiayaha Golaha.
6. Haddii Guddoomiye ku-xigeenka 1aad ama ka 2aad uu jagada bannaanaatay ic-laamiyo in uu u sharraxan yahay, waa in uu iska casilaa xilka Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ama Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Goluhuna ka aqbalaa isla markaana waxaa Golaha Guddoominaya Mudanaha ugu da'da weyn ee aan ahayn musharraxa, habka doorashada Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa waxa loo kala horaysiinayaa sida magacyadu u kala horeeyaan Af-soomaali ahaan waxana la horeysiinayaa shaqalka**.**
7. Musharixiinta doonaysa in loo doorto xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenada waa in ay yihiin xubno ka tirsan Golaha wakiilada
8. Musharax kastaa wuxuu qoraalkiisa ku soo qeexayaa jagada uu u tar-tamayo haddii ay tahay tan Guddoomiyaha ama tan ku-xigeenada (1aad ama 2aad)
9. Guddoomiyaha Goluhu musharixiinta wuxuu siinayaa waqti hadal jeedin ah mudanayaasha dooranaya si ay Golaha ugu qan-ciyaan in ay u codeeyaan.
10. Haddii uu mudane keliya uu noqdo musharaxa Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, mudanahaas waxaa loogu dhawaaqayaa in uu yahay Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.
11. Haddii ay Musharixiintu noqdaan laba Mudane ama in ka badan Goluhu wuxuu ku kala saarayaa cod gacantaag ah.
12. Codaynta waxaa loo raacayaa sida ku cad Qodobka 25aad ee Xeer-Hoo**s**aadka Golaha Wakiilada.
13. Musharaxa ugu cod bata waxa uu ku guulaysanayaa in uu noqdo Guddoomiyaha Golaha wakiilada.
14. Dooroshooyinka Guddomiye ku-xigeenada waxa la waafajinayaa habraaca doorashada Guddoomiyaha.

# CUTUBKA 3_AAD

# GUDDOONKA, XAFIISKA IYO GUDDIYADA GOLAHA

## Qodobka 7aad
## Qaab-dhismeedka Golaha

1. Qaab-dhismeedka Golaha wakiiladu waxa uu noqonayaa sidan:

**B**

b. Gole-weynaha
t. Guddoomiye
J. Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad
x. Guddoomiye-ku- xigeenka 2aad
kh. Guddi –hoosaadyada

**T**

b. Xoghaye Guud
T. Xoghaye Guud ku –xigeen
j. La taliye-yaal
x. Waaxyo aan tiradoodu ka badnayn 10 Waaxood, waana la kordhin-Karaa hadii loo baahdo iyo Shaqaale weynaha.

2. Xoghayaha guud iyo Ku-xigeenkiisa waxaa soo magacaabaaya Guddoomiyaha Golaha.

3. Guddoomiyaha ayaa dhaarinaya Xoghayaha Guud iyo ku xigeenkiisa, waxana lagu dhaarinayaa dhaarta Dastuuriga ah.

4. Guddoomiyaha ayaa shaqo joojin ku samayn karra xilkana ka qaadi kara Xoghayaha Guud iyo ku-xigeenkiisa.

   b. Xoghaynta Golaha waxaa lagu xulanayaa sida aqoontooda cilmiyeed iyo khibradoodu ay u kala sarayso.

   t. Iyadoo qodobka 52aad ee Dastuurka sidiisa loogu dhaqmayo Xoghayaha Guud ayaa soo jeedinaaya dalac siinta, darajo hoos u dhiga, kala bedelka iyo shaqo ka joojinta shaqaalaha Golaha waxaana go'aan ka gaadhaya Gudoomiyaha Golaha.

   j. Arrimaha la xidhiidha cabashada shaqaalaha, racfaan IWM waxaa loo gudbinayaa Guddida joogtada iyo anshaxa oo awood u leh dib-u-eegista cabashada shaqaalaha.

   x. Xoghaynta Goluhu waxay ku hawl galayaan una cuskanayaa gudashada xilkooda tilmaamaha (Directives) , awaamirta Guddoomiyaha Golaha wakiilada, waxayna u gudanayaan si waafaqsan xeer-hoosaadka iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.

Kh. Xoghaynta waxa waajib ku ah in xubin ama xubno ka tirsani ay ka qayb galaan shir-kasta oo u qabsooma Golaha Wakiilada, si ay u diiwaangeliyaan Dooddaha, isweydiinaha, go'aamadda Goluhu gaadho, iyo hadal qoraalka (Minutes).

d. Mashruuc sharci kasta oo doodiisu dhammaatay waa in qoraal ahaan, maqal iyo muuqaal ahaan loogu kaydiyaa Xusuus dhawrka (Archives) Golaha, mudanayaashuna helaan nuqulo hadal-qoraalka ah, iyadoo ay la socdaan magacyada ka qayb-galay doodda.

r. Fadhiyada xidhan iyo shirarka lagaga hadlaayo arrimaha khuseeya Shaqaalaha Golaha, loogama baahna in ay Xoghayntu ay ka qayb qaadato, Marka laga reebo Xoghayaha iyo Ku-xigeenkiisa haddii loo baahdo**.**

s. Xoghaynta Golaha waxaa xil ka saaran yahay xafidaadda hantida Golaha dhukumantiyada iyo qoraalada la xidhiidha Golaha, isla markaana waxaa masuuliyad gaar ah ka saaran tahay inay ilaaliyaan wax allaale wixii Guddoomiyahu u aqoonsado (SIR) ciddii faafisana mutaysato ciqaab sharciyeed.

sh. Si loo sugo kala madax-bannaanida waaxaha dawladda, xoghaynta iyo shaqaalaha kale ee Golaha Wakiiladu, xuquuqdoodda iyo waajibaadkoodda waxaa nidaaminaya lifaaqa xeer-hoosaadka.

dh. Xoghaynta Golaha waxaa ka reeban in ay la murmaan kalana doodaan Mudaneyaasha Golaha shaqadoodda loo soo igmaday.

c. Xoghaynta Goluhu waa in aanay ku dhex mil-min, dhex-dhexaadna u noqdaan Mudanayaasha oo aanay kala raacin, hadii ay taasi dhacdana waxay mutaysan doonaan ciqaab sharciyeed.

g. Xoghaynta Goluhu waa in aanay ka qayb qaadan shirarka u gaara mudanayaasha Golaha, shirarkaas oo aanay mudanayaashu ka dalban.

## Qodobka 8aad
## Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Wakiillada

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladu wuxuu leeyahay awoodahan hoos ku xusan:

1. Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta iyo dhawrista Xeer-Hoosaadka.
2. Ilaalinta nidaamka Golaha.
3. Wuxuu ilaalinayaa habsami u socodka hawlaha Golaha sida Xeer-dejinta, dejinta maamulka iyo hab-maamuuska.
4. Wuxuu furayaa, xidhayaana fadhiyada Golaha.
5. Wuxuu furayaa fadhiga haddii uu kooramku dhan yahay, xidhayaana fadhiyada haddii aanay soo jeedimo kale ka jirin Golaha,

6. Wuxuu sheegayaa ajendaha fadhiga soo socda, isaga oo af-ahaana ku war-gelinaya xubnaha Golaha Wakiilada,
7. Wuxuu hogaamiyaa dooddaha, wuxuuna hadalka u qaybiyaa mudaneyaasha.
8. Wuxuu nidaamiyaa habka codaynta, wuxuuna ku dhawaaqaa natiijadooda.
9. Wuxuu kormeerayaa shaqada Golaha iyo hawl-maal-meedka ay qabtaan Shaqaaluhu.
10. Wuxuu matalaa kuna hadlaa magaca Golaha Wakiilada.
11. Wuxuu xidhiidhiyaa Golaha iyo Baarlamaannada adduunka ee dhiggiisa ah
12. Guddoomiyuhu wuxuu soo geli karaa heshiis caalami ah, marka uu soo galo, wuxuu Goluhu ku ansixinayaa heshiiskaas cod hal-dheeri (aqlabiyad fudud).
13. Wuxuu saxeexaa heshiisyada caalamiga ah ee Goluhu la galayo baarlamaanada adduunka ee dhigiisa ah.
14. Wuxuu magacaabayaa Xoghayaha Guud ee Golaha iyo ku xigeenkiisa, wuxuuna ku sameyn karaa shaqo ka joojin ama xil ka qaadis.
15. Wuxu dhaariyaa Xoghayaha Guud iyo ku-xigeenkiisa
16. Wuxuu saxeexaa go'aamada Golaha iyo waraaqaha kale ee rasmiga ah.
17. Marka uu Gudoomiyuhu maqan yahay waxa saxeexaya Gudoomiye Ku-xigeenka1aad ee Golaha, marka labaduba maqan yihiina Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha
18. Wuxuu Guddoominayaa Guddida Hawlaha Golaha Wakiilada (Business Committee)
19. Wuxuu magacaabayaa iskuna bedelayaa Xubnaha Guddiyada Golaha
20. Wuxuu ahaanaya mid u dhex ah mudaneyaasha marka laga reebo xaalada cod-kiisa loo baahdo.
21. Guddoomiyuhu fasaxa uu siinayo mudanaha kama badnaan karto hal (1) kal-fadhi, hadii duruufo jira awgeed uu u baahdo mudanuhu fasax intaa ka badan waxa la siinayaa fasax uu ku soo dhamaysto duruufihiisa waxaana laga jarayaa gunooyinka fadhiyada dhamaantood.

## Qodobka 9aad
## Awoodaha Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiillada

1. Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu haddii uu maqan yahay ama aanu qaban Karin xilkiisa, sabab kasta ha ahaatee, waxaa hawshiisii fulinaaya si ku meel gaadh ah Guddoomiye ku-xigeenkiisa 1aad, haddii uu isaguna maqnaado waxaa hawshiisii qabanaya Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Golaha.

2. Guddoomiye ku-xigeenadu waxay qabanayaan marka uu Gudoomiyuhu maqan yahay hogaaminta fadhiyada Golaha iyo wixii kale ee Guddoomiyuhu u igmado.
3. Marka uu joogo Guddoomiyuhu waxa labada ku-xigeen qaban karaan xil kasta oo Guddoomiyuhu u igmado
4. Guddoomiye-ku-xigeennadu waxay ka doodi-karaan ajendaha iyo hawlaha kale ee Golaha horyaala, waxayna leeyihiin cod la mid ah kan mudanayaasha kale
5. Guddoomiye ku-xigeennadu marka ay gud-binayaan doodda waxay ka soo degayaan kuraasta sare, waxayna u soo degayaan dooddana ka soo jeedinayaan fagaaraha.

## Qodobka 10aad
## Xil-Waayida Guddoomiyaha & Ku-xigeenadiisa

1. Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku- xigeen waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:

   b. Geeri ku timaadda.

   t. Is casilaad qoraal ah oo uu u soo gudbiyo Golaha, Isla markaana Goluhu ka aqabalo.

   j. Maqnaasho cudur-daar la’aan ah oo gaadhaya 45 cisho oo isku xigta.

   x. Ku xad-gudub shareecada islaamka, Dastuurka Qaranka, Xeer Hoosaadka Golaha.

   kh. Xil gudasho la’aan joogta ah.

   d. Soo jeedin (motion) xilka qaadis Guddoomiyaha iyo labada ku-xigeen waxaa keeni kara xildhibaano aanay tiradoodu ka yareyn (1/3) tirada guud ee Xildhibaanada Golaha wakiilada.

   r. Dhimir-kiisa oo wax u dhiman (waali) taas oo loo baahan yahay in uu soo cadeeyo guddi dhakhaatiir ah oo la aqoonsan yahay laguna kalsoon yahay.

   s. Caafimaad daro joogta ah ama awood beelid aanu xilka la gudan karin, taas oo loo baahan yahay in uu soo cadeeyo guddi dhakhaatiir ah, oo la aqoonsan yahay laguna kalsoon yahay, waxana dalbanaya guddida joogtada ah ee Golaha.

   sh. Xukun kama dambays ah ay ku riday maxkamad awood u leh oo uu ku Mutaysanaayo xabsi aan ka yarayn sadex sanno (3)

2. Soojeedinta xil ka qaadista Guddoomiyaha kuna salaysan asbaabaha ku xusan faqrada 1aad, waxaa keeni Kara xildhibaano aan tiradoodu ka yarayn saddex meelood meel (1/3) tirada guud ee Golaha. Codka xil ka qaadista wuxuu ku ansaxayaa aqlibiyada saddex meelood laba meel (2/3) ee xubnaha guud marka laga reebo xubnaha bannaanaan-shahooda la baahiyay.
3. Moshinka xil ka qaadista labada Gudoomiye ku-xigeen, kuna salaysan asbaabaha ku xusan faqrada 1aad, xarfaheeda j, x, kh, waxaa keeni kara xildhibaano aan tiradoodu ka yarayn saddex meelood meel (1/3) tirada guud ee Golaha. Codka xil ka qaadista Guddoomiye ku xigeenadu waxay ku ansaxayaa aqlibiyada saddex meelood laba meel (2/3) ee xubnaha Golaha marka laga reebo xubnaha bannaan-shahooda la baahiyay.
4. Soo jeedinta mooshinka xil ka qaadista Guddoomiyaha Golaha iyo ku-xigeenadiisa waa inay ahaataa mid sababaysan oo waafaqsan xeer-hoosaadka.
5. Mooshinka xil ka qaadista waxaa laga doodayaa laguna codaynayaa (7) maalmood gudahood oo maalmo shaqo ah, kamana yaraan karto 24 saacadood gudahood laga bilaabo taariikhda la keenay Golaha.
6. Haddii mooshin xil ka qaadis laga keeno Guddoomiyaha Golaha, waxa fadhiga loogu codeynayo hogaaminaya Guddoomiye ku-xigeenka 1$^{aad}$ hadii guddoomiye ku-xigeenka 1aad ku jiro mudaneyaasha keenay mooshinka waxaa shirkaa hogaaminaya guddoomiye ku-xigeenka 2$^{aad}$.
7. Haddii Guddoomiyaha iyo ku- xigeenadiisa isku mar keliya laga keeno mooshin ah xil-ka-qaadis waxaa la marayaa talabooyinka soo socda:

   b. Guddoomiyaha ama Ku xigeenada laga keenay soo jeedinta (motion) xil-ka-qaadida waa in laga wareejiyo gudoominta fadhiyada inta ay ka dhamaanayso arrinta la xidhiidha codayntu waxaana fadhigan Guddoominaya mudanaha ugu da'ada weyn, Codeyntuna waa gacantaag.

   t. Hadii Guddoomiyaha ama Guddoomiye Ku-xigeenadu ay lumiyaan xilka, si waafaqsan Qodobka 10$^{aad}$ ee xeer hoosaadka Golaha, Goluhu wuxuu muddo todoba maalmood ah gudahood ku dooranayaa Guddoomiye iyo guddoomiye ku-xigeenano cusub.

8. Haddii Guddoomiye ku-xigeenka 1$^{aad}$ ama 2$^{aad}$ isu sharaxaan xilka Guddoomiayaha marka ay bannaanaato, waa in ay u soo gudbiyaan is-casilaad Guddoomiyaha fadhiga, Goluhuna ka ogolaado.

## Qodobka 11aad
## Xilka Xoghayaha Guud Ee Golaha Wkiilada

Xoghayaha Guud ee Goluhu isagoo raacaaya awaamirta Guddoomiyaha wuxuu u xilsaaran yahay:

1. Maamulka iyo habsami u socodka hawlaha Golaha wakiilada
2. Dhawrista nidaamka Golaha
3. Nabad-gelyada, xasiloonida goobta iyo xubnaha Golaha
4. Kormeerka iyo hubinta dhaqan-gelinta jadwalka safarada xubnaha Golaha
5. Ilaalada iyo xanaanada Hantida Golaha
6. Kormeerka xafladaha, dhawrista hab maamuuska, ilaalinta qaabka fadhiga Golaha iyo martida
7. Inuu hubiyo in la wargeliyey mudanayaasha waqtiyada shirarka Golaha isaga oo qoraal ugu gudbinaaya marka uu Guddoomiyuhu uu ogolaado waa in lagu wargeliyaa 24 saacadood ka hor, haddaan guddoomiyuhu muujin xaalad deg-deg ah.
8. Wuxuu u soo diyaarinayaa mudanayaasha ajendaha maalin-kasta bilawga fadhiga
9. Xoghayaha wuxuu Guddoomiyaha Golaha la saxeexayaa xeerarka iyo go'aamada Golaha.
10. Akhrinta digreetooyinka ama qoraalada la soo jeediyo marka Guddoomiyuhu ogolaado.
11. Xaadirinta mudanyaasha marka Guddoomiyuhu amro.
12. Maamulka iyo Kormeerka shaqaalaha Golaha markay gudanayaan waajibaadka hoos ku qoran:

    b. Diiwaangelinta codsiyada mudanayaasha raba in ay hadlaan, iyadoo loo tixgelinaayo sida ay u soo kala horeeyeen.

    t. Hubinta diyaarinta iyo u qaybinta qoraalada ay mudanayaashu u baahan yihiin fadhiga ka hor.

    j. Hubinta qaadista Minutes-ka ee fadhiga Golaha.

    x. Hubinta tirada xildhibaanada, codadka la bixiyay iyo arrimaha kale ee Goluhu go'aan ka gaadhay, hadal qoraalka, hadalada iyo sixitaanka.

    kh. Hubinta saxnimada qoraalada iyo kaydinta buugga diiwaan gelinta xaadirinta Mudanayaasha Golaha.

d. Hubinta in dhamaan go'aamada iyo sharciyada uu Goluhu soo saaray sida:-

- In ay raad-raac sax ah laga reebo qoraal ahaan iyo muuqaal ahaanba si wanaagsanna loo diiwaangeliyo.
- Go'aankaasi amaba xeerkaasi waa in muddo todoba maalmood gudahood ah u kaga baxaa Golaha una gudbaa Golaha uu khuseeyo (Madaxtooyadda iyo Guurtida).
- Xoghayntu waxay u xil saaran yahay gudashada shaqadii kale ee Guddoomiyuhu u u igmado.
- Marka Xoghayaha Guud maqan yahay waxa xilkiisa sii haynaya ku-xigeenkiisa.

13. Xeer kasta oo uu Goluhu ansixiyey una gudbaya Madaxweynaha waxaa hubinaaya Guddida Hawlaha Golaha iyo lataliyaha sharciga waxaana wada saxeexaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha.

## Qodobka 12aad
## Xilka Xog-haye Ku-xigeenka

1. Xoghaye Guud ku-xigeenku waxa uu qabanayaa xilka xoghayaha guud marka uu maqan yahay.
2. Waxa kale oo uu qabanayaa shaqooyinka uu u igmado Xoghayaha Guud.

# CUTUBKA 4_AAD
# MUDANAYAASHA GOLAHA WAKIILADA

## Qodobka 13aad
## Xilka Mudanayaasha Golaha Wakiilada

1. Mudane kasta oo ka mid ah Golaha wakiilada waa in uu xilkiisa u gutaa si waafaqsan xeer-hoosaadka Golaha, Dastuurka iyo Xeerarka kale ee dhaqan-galka ah ee khuseeya Golaha.
2. Iyadoo la eegaayo waajibaadka ku cad farqada 1aad ee qodobkan, mudane kasta oo ka mid ah Golaha wakiiladu, xil gaar ah ayaa ka saaran matalaada degaanka codbixiyeyaasha laga soo doortay
3. Xilliga fasaxa Golaha Xildhibaanada waxa looga baahan yahay arrimahan soo socda:-

   b. Haddii xaalad nabadgelyadda iyo dhaqaalahu ay saamaxdo, waa in mudanuhu booqdaa degaanada laga soo doortay.

t. Kharashka mudanayashu ay ku booqanayaan Deegaamada laga soo doortay waxa lagu qoondaynayaa miisaaniyadda Golaha iyadoo loogu qaabaynayo wadar ahaan.

j. In ay qabtaan kulamo guud ay bulshada kula socodsiinayaan arrimaha Golaha horyaala si ay ugala tashadaan iyo guud ahaan xaalada wadanku halka ay marayso.

x. In ay kala tashadaan arrimaha guud ee ay danaynayaan iyo baahida degaanka.

kh. In ay Golaha uga soo gudbiyaan warbixin qoraal ah waxii ay kala soo kulmeen Booqashadoodda hawleed.

4. Shan iyo toban xildhibaan (15) wax ka badan fasax lagama siin karo kal-fadhigiiba.

## Qodobka 14aad
## Xuquuqda Mudanayaasha Golaha

1. Dhawr-sannaanta iyo xuquuqda xubinta Golaha Wakiilada waxay aahaanayaan sida uu dhigaayo Qodobka 49aad ee Dastuurka JSL.
2. Mudanuhu wuxuu Golayaasha Qaranka xaq ugu leeyahay in lagala tashado arrimaha deegaanka laga soo doortay khuseeya oo dhan, loona tix geliyo rayigiisa.
3. Xuquuqda mushahar iyo gunno ee Guddoomiyaha, ku xigeenada iyo xildhibaanadu waxay ka bilaabanayaan maalinta Maxakamadda sare ku dhawaaqdo, waxaana loo raacayaa sida uu qeexayo Xeer Lr 46/2010 ee Xeerka kala xadeynta mushahaarooyinka, Gunnooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenka iyo mudanayaasha xeer dejinta.
4. Wixii xaquuqa ah ee ka maqnaada xildhibaanada muddada ay xilka hayeen, waxaa waajib ku ah xukuumad kasta oo timaada in ay bixiso xuquuqda uu muteystay oo buuxda.
5. Xildhibaanka laga qaaday xasaannada wuxuu qaadanayaa gunnooyinkiisa oo dhan marka laga reebo gunno fadhi, hase yeeshee kama qayb-gelayo fadhiyada Golaha, ilaa iyo inta maxkamadu ka gaarayso xukun kama dambays ah arrintaas lagu soo eedeeyey.
6. Haddii Xildhibaanka la eedeeyey lagu waayo dembigii wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo dhammaan xuquuqdii ka baaqataay.

7. Kharashka iyo Daawaynta xaaladaha caafimaad ee ku yimaadda mudanayaasha Golaha Wakiillada waxa lagu qoondaynayaa miisaaniyadda Golaha.
8. Muddada ay haweenka xildhibaanada ah ay ku jiraan fasaxa dhalmada waxay xaq u leeyihiin in la gaadhsiiyo qoraalada iyo go'aamada Goluhu gaaro bishiiba hal mar.
9. Wixii la xidhiidha fasaxa dhalmada iyo mudadiisa waxaa faah faahinaya shuruucda dalka.

## Qodobka 15aad
## Maamuuska iyo Xasaanadda Mudanayaasha Golaha

1. Xubnaha Golaha wakiilladu waxa ay leeyihiin xasaanad sida ku xusan Qodobka 49aad ee Dastuurka Qaranka.
2. Xildhibaanadu waxay xaq u leeyihiin in ay ka helaan xurmayn iyo maamuus dhammaystiran xafiisyada, waaxaha fulinta, garsoorka, iyo hay'addaha kale ee dawladda heer qaran, gobol iyo degmo, gaar ahaan ciidamada iyo hay'addaha samafalka caalamiga ah ee ku sugan dalka.
3. Xildhibaanka lama baadhi karo gaadhigiisa, gurigiisa iyo naftiisaba.
4. Xildhibaanka talaabo sharci lagama qaadi karo haddii aan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi aan ciqaabtiisu ka yarayn Saddex (3) Sanno, sida ku cad qodobka 49aad ee Dastuurka JSL, iyadoo ay waajib tahay in ogeysiis la siiyo Golaha Wakiilada si deg deg ah.
5. Markii xildhibaan laga qaadaayo xasaannadda waa in ay ogolaadaan sadex meelood oo laba meelood 2/3 tirada guud ee xubnaha Golaha iyadoo laga reebaayo kuraasta bannaanaan-shahooda la baahiyey.
6. Golaha Wakiiladu waxa uu curin doonaa xeer jideynaya in mudanayaasha xeerdejinta gadiidkooda la siiyo sumad (lambar) u gaar ah.

## Qodobka 16aad
## Ka Xaadiridda Fadhiyada Golaha

1. Xildhibaan kasta waxaa waajib ku ah inuu soo xaadiro fadhiyada Golaha.
2. Saacadaha shaqada ee Goluhu waa sideeda (8) subaxnimo ilaa laba iyo tobanka duhurnimo (12).
3. Haddii ay jirto baahi sii wadid shaqo Goluhu wuu sii wadayaa shaqada ilaa inta ay ka dhamaanayso.

4. Waqtiga saxeexa warqadda xaadiriska waa 08:00-08:45 subaxnimo.
5. Waxa Goluhu yeelan karaa aalad casri ah oo sahasha xaadiriska mudanayaasha iyo ilaalinta saacadaha imaatinka iyo bixida
6. Warqadda xaadiriska mudanayaasha waa in maalin kasta Xoghayaha Guud u gudbiyaa Guddida Joogtada ah ee Golaha.
7. Mudane kasta waa inuu madasha shirarka ee Golaha fadhiyaa ugu dambeyn 08:45 subaxnimo.
8. Fadhiyadu waxay bilaabmayaan ugu dambeyn 09:00 subaxnimo.
9. Xildhibaankii fasax la'aan ama cudur-daar la'aan ka maqanaada fadhiyada (3) maalmood shaqo oo isku xiga wuxuu mutaysanayaa digniin qoraal ah.
10. Haduu mudanuhu cudur daar la'aan maqanaado muddo gaadhaysa todoba (7) maalmood oo xidhiidh ah ama teel teel ah soddon maalmood gudahood, waxaa laga jarayaa gunno fadhiyeedkiisa maalin kasta oo uu maqnaado.
11. Haddii maqnaashaha mudanuhu ka badnaado mudada kor ku xusan waxaa loo gudbinayaa warbixintiisa/teeda Guddoomiyaha Golaha si loo hordhigo Guddida Joogtada ah ee Golaha.
12. Gunnada fadhiga ee laga jaro xildhibaanada waxaa loo furayaa xisaab (Account) gaar ah oo magaceedu yahay daryeelka mudanayaasha iyo shaqaalaha Golaha Wakiilada, waxa loo adeegsanayaa hadba baahida looga maarmiwaayo.
13. Kalfadhi kasta waxa gaarkiisa la isugu geynayaa maqnaashaha mudanaha waxaana guddida joogtada ahi ku soo saareysaa qoraal.
14. Mudanaha maqnaashihiisu gaadho konton iyo lix maalmood (56) oo aan isku xigin sannad gudihii waxaa loo aqoonsanayaa mudane xilkiisa gudan waayey waxaana qabanaya Qod. 50aad, Faq 3aad ee Dastuurka. Mudanahan waxa go'aan ka gaadhaya Gole weynaha.
15. Haddii mudanuhu soo xaadiro bilowga fadhiga, ka dibna iska baxo fasax la'aan, wuxuu la mid yahay lana xukun yahay xildhibaan ka maqan fadhiga.
16. Mudanuhu fadhiga kama bixi karo cudur daar la aan ilaa Guddoomiyhu uu xidho fadhiga socda.

## Qodobka 17aad
## Labiska iyo Haybada Mudane

1. Mudanayaasha Golaha wakiladu labiska ay ku imanayaan waa inuu ahaadaa mid sharafta iyo karamada Mudanaha ku haboon kana hor imanaynin shareecada islamka.
2. Mudanayaasha haweenka ee ka tirsan Golaha wakiilada waa in lebiskoodu ahaadaa mid asturan.

## Qodobka 18aad
## Waayida Xubinnimada Golaha wakiilada

Waayidda Xubinimada Golaha wakiilada waxaa loo raacayaa qodobka 50aad ee Dastuurka. Xubinimada Golaha Wakiilada waxaa lagu waayi-karaa:

1. Xubintu geeriyooto ama uu ku yimaado xanuun suurto gelin waaya gudashada xilkeeda.
2. Xubintu istiqaalad dhiibto, iskeedna shaqada uga tagto, Goluhuna ka ogolaado
3. Uu jabo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay ama uu gudan waayo xilkiisa
4. Uu ku dhaco xukun ciqaabeed kama dabays ah oo maxakamad horteeda kaga cadaaday,
5. Uu ka maqnaado Golaha 20 (labaatan) fadhi oo isku xiga idan la'aan.

# CUTUBKA 5_AAD
# MADAXWEYNAHA

## Qodobka 19aad
## Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada

1. Madaxweynuhu waa inuu fadhiga wada jirka ah ee labada gole ka jeediyaa khudbad sannadeedka bilowga sannad kasta sida Qodobka 46aad farqadiisa 4aad ee Dastuurka.
2. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu hadal ka jeedin karaa Golayaasha Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiilada) munaasabadaha soo socda:-

   b. Furitaanka Kalfadhiyada Golaha
   t. Wuxuu la hadli karaa Golaha mar kasta oo uu codsado.
   j. Fadhiyada ay labada Gole ka codsadaan inuu hor yimaado.

3. Madaxweynaha waxaa ka reeban ka qayb-galka fadhiyada caadiga ah ee Golaha wakiilada.
4. Hadal jeedinta Madaxweynaha mudanayaasha labada Gole ama Golaha wakiillada, waxay su'aalo ka weydiin karaan nuxurka qudbadiisa.

## Qodobka 20aad
## Eedaynta iyo Maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa

Maamuus ka xayuubinta madaxweynaha waxa loo raacayaa qodobka 96aad ee Dastuurka qaranka JSL.

# CUTUBKA 6_AAD
# KALFADHIYADA IYO FADHIYADA GOLAHA WAKIILADA

## Qodobka 21aad
## Kal-fadhiyada iyo Fadhiyada Golaha Wakiillada

1. Golaha wakiiladu wuxuu sannadkiiba yeelanayaa saddex kalfadhi (sessions) oo caadi ah sida ku cad Qodobka 46aad ee Dastuurka oo gaadhaya muddo sideed iyo labaatan (28) todobaad ah.
2. Labadii kal-fadhi waxa u dhexaynaaya ugu yaraan afar (4) todobaad ugu badnaanna sideed (8) todobaad oo fasax ah.
3. Kal-fadhi kasta marka uu dhamaado Goluhu wuxuu ugu yaraan qaadanayaa afar (4) todobaad oo fasaxa ugu badnaana sideed (8) Sideed todobaad.
4. Goluhu wuxuu qabsan karaa kal-fadhiyo aan caadi ahayn oo waafaqsan xeer-hoosaadka.

## Qodobka 22aad
## Kal-fadhiyada Aan Caadiga Ahayn Ee Golaha

Kal-fadhiga aan caadiga ahayn ee Golaha Wakiiladu sida ku cad qodobka 46aad ee Dastuurka wuxuu ku qabsoomi karaa:-

b. Codsi ka yimaadda Madaxweynaha JSL oo ujeeddadiisu ku faah-faahsan tahay Xeer Madaxweyne**.**
t. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada oo isugu yeedha.
j. Saddex meelood meel (1/3) tirada xubnaha Golaha Wakiilada oo qoraal ku codsada una gudbiya Guddoomiyaha.

## Qodobka 23aad
## Ajendaha Golaha

1. Guddida Hawlaha Golaha (Business Committee) ayaa u xilsaaran diyaarinta ajendaha kal-fadhiyada Golaha.
2. Fadhiga ugu horeeya ee kalfadhi kasta ayaa qoraal ahaan loogu qaybinayaa Golaha qabyo qoraalka (draft agenda) ee kalfadhigaas waxaana mudanayaasha la siinayaa 24 saacadood inay ku soo akhriyaan Ajendaha haddii aan Golaha soo jeedin kale ka iman.
3. Gole waynaha ayaa ka dooddaya ka dibna ku ansixinaya cod haldheeri ah Ajendaha.

## Qodobka 24aad
## Guntanka (Quorum)

1. Kala badh iyo hal tirada guud ee xubnaha Golaha ayaa noqonaaya guntanka (Quorum) marka laga reebo xubnaha la baahiyey bannaan-shahooda.
2. Gudoomiyaha ayaa xaqiijinaya guntanka inta aan codka la qaadin, isaga ayaana go'aan ka gaadhaya goor walba ee la hubinaayo guntanka.
3. Ka hor inta aanu Goluhu codayn, xubin kasta oo Golaha ka tirsan waxay codsan kartaa in la hubiyo guntanka taas oo Guddoomiyaha ku waajibinaysa in uu hubiyo guntanka (Kooram).
4. Go'aanada ka soo baxa fadhiga Golaha waa sax/sharci haddii guntan uu jiray xilligii codka isla markaana waafaqsanyahay xeer hoosaadka.
5. Codbixin kasta oo u baahan tiro cayiman, oo aan ka aheyn kuwa u baahan cod hal dheeri ah ee xubnaha jooga, inta aysan codbixintu dhicin, Guddoomiyuhu waa in uu hubiyaa in ay fadhiyaan tirada loo baahan yahay ee ay ku ansaxayso cod bixintaasi.
6. Haddii ansixinta mooshin ama qodob ajendaha ka mid ah uu u baahan yahay tiro saddex meelood laba meel, ugu yaraan xubnaha Golaha wakiiladu waa in ay xaadir yihiin codka ka hor.

## Qodobka 25aad
## Noocyada Codaynta.

1. Cod-bixintu waxay u dhacaysaa Cod-bixin gacan taag ah
2. (11) mudane ayaa Golaha u soo jeedin karra in codka gacan taagga ah laga dhigo qarsoodi isla markaana Golaha ayaa ku ansixiniya cod hal dheeri ah.

3. Kaddib marka Goluhu ansixiyo in cod qarsoodi ah, waxaa loo raacayaa hab-raacan:

   b. Guddoomiyaha Goluhu waa in uu diyaariyaa sanduuqa cod-bxinta, isla markaana sharraxaa hab-raaca codaynta.

   t. Guddoomiyuhu waa in uu amraa xaqiijinta tirada mudanayaasha fadhiya fadhiga, iyo in loo qaybiyo xaashida codaynta oo yeelanaysa tix-raac gaar ah.

   j. Guddoomiyuhu waa in uu xaqiijiyaa xubnaha codeeyay, kuwa xumaaday, kadibna wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada**.**

4. Haddii tirada codadka ogolaaday iyo kuwa diiday ay isku mid noqdaan, Guddoomiyaha ayaa codaynaaya si uu u kala saaro labada dhinac

5. Xubnaha jooga fadhiga balse aan ka qayb qaadan cod-bixinta waxaa loo xisaabinayaa sida codadka xubnaha aamusay oo kale.

6. Inta lagu dhawaaqaayo natiijada cod bixinta, xubin Golaha ka tirsan looma ogola inay hadal ka jeediso Golaha ama ka baxdo.

7. Natiijada cod-bixin kasta waxaa ku dhawaaqaaya Guddoomiyaha Golaha isagoo sheegaya tirada mudanayaasha fadhiga fadhiya, codadka ogolaaday, diiday, xumaaday iyo kuwa aamusay.

## Qodobka 26aad

## Habka Doodda iyo Anshaxa xubnaha

1. Mudane walba wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u cabiro lana xurmeeyo ra'yigiisa marka Golaha laga dhex dooddaayo.

2. Mudane raba inuu hadal jeediyo wuxuu raacayaa talaaboyinka soo socda:-

   b. Marka Guddoomiyuhu hadalka siiyo Mudane waxa uu ku bilaabayaa hadalkiisa mahadsanid Mudane Guddoomiye.

   t. Waxa uu ugu yeedhayaa Mudane marka uu tilmaamayo xubin kale oo ka mida Golaha wakiilada.

   j. Marka uu sheegaayo qof kale oo ka mida madaxda qaranka waxa uu ugu yeedhayaa Mudane amaba Marwo.

   x. Xubinta rabta in ay hadasho waxay taagaysaa gacanta iyadoo aan qaylin, kicin amaba ficil kale samayn.

   Kh. Xubina ma hadli karto, calaamadna kuma muujin karto ra'yigeeda hadii aanu Guddoomiyuhu u ogalaan.

d. Xubinta hadasha iyadoo aanu Guddoomiyahu u ogolaan wuu ka joojinayaa hadalka.

r. Hadii xubintu hadalka sii wado waxa uu siinayaa digniin, hadduu sii wado hadalkana digniin labaad, haddii uu sii wado hadalkana fadhiga ayuu guddoomiyuhu amrayaa in laga saaro mudanahaa.

3. Xubnuhu waa in ay ku dhaqmaan Qodobadan soo socda:-

b. Xildhibaanku waa in uu u cabiraa fekerkiisa si cad oo kooban.

t. Xildhibaanku waa in uu run ka sheegaa fekerkiisa iyo hadalkiisa.

j. Xildhibaanka hadaladiisa waa in aanay ku jirin kicin iyo hadalo qas gelin kara Golaha iyo qarankaba.

x. Xildhibaanka hadlaaya lagama dhex geli karo hadalkiisa lagumana qaylin karo hadaanu jirin saxitaan.

Kh. Waxaa Golaha ka mamnuuca qaylo, foodhi, sacabin iwm.

d. Xildhibaanku kama bixi karo fadhiga ka dib marka uu dhiibto fikirkiisa ilaa uu ka fasax qaato Guddoomiyaha.

r. Xildhibaanku kuma qaybin karo qoraalo aanu fasaxin Guddoomiyuhu.

s. Waxaa ka reeban xildhibaanada in ay qalalaaso ka sameeyaan Golaha iyo agagaarkiisa.

sh. Waxaa ka reeban in laga baxo Golaha marka uu guddoomiyahu uu hadlaayo amaba ay socoto cod bixin.

dh**.** Waxaa mudanayaasha ka reeban in ay xog ahaan u adeegsadaan dacwad ka socota hayadaha garsoorka isla markaana aan go'aan laga gaadhin**.**

c. Waxaa Xildhibaanada ka reeban in ay hadlaan ama ay buuqaan marka uu hadlaayo xildhibaan kale.

g. Waxaa xildhibaanada ka reeban in ay hadlaan marka ay socoto cod bixini.

f. Xilliga uu hogaaminaayo Guddoomiyuhu fadhiga looma tagi karo, waxna looma sheegi karo, Xoghaynta ayaa wixii qoraala iyo fariimo loo marinayaa

## Qodobka 27^aad

## Dhexgal Toosineed (Points of Order) ama *Sixitaan (point of correction)*

1. Mudane kastaa wuxuu codsan karaa toosin (point of order) ama sixitaan (point of correction) isaga oo aan hadalka lahayn, iyadoo Mudane kale u wato hadalkiisa.

2. Guddoomiyuhu wuxuu siinayaa hadalka mudane codsaday toosin ama sixitaan.
3. Marka la siiyo hadalka mudanaha codsaday wax toosinta ama sixitaanka, waxa laga rabaa in uu si toos ah u abaaro ujeedada, si koobana u tilmaamo arrinta uu codsaday.
4. Mudanaha loo ogolaaday toosinta ama sixitaanka kama bixi karo wax ka baxsan nuxurka arrinta u toosinta ama sixitaanka u qaatay, haddiise uu ka baxo guddoomiyuhu wuu ka joojinayaa hadalka.
5. Gudoomiyaha Goluhu marka uu hadlayo lagama qaadan karo dhexgal Toosineed (Points of Order) ama *Sixitaan (point of correction)*

**Qodobka 28aad**

**Hadal Jeedinta Wasiirada & Madaxda kale**

1. Wasiirada iyo madaxda kale ee u yimi Golaha Wakiilada si ay mudanayaashu su'aalo u waydiiyaan, waxay ka qayb qaadan doonaan fadhiyada Golaha si ay uga jawaabaan su'aalaha la waydiinayo sida uu faraayo Qodobka 53 (6) ee Dastuurka JSL
2. Guddoomiyuhu waxa uu mudanayaasha u sii shaacin doonaa maalinta uu imanayo wasiirku ama madaxda kale ee Golaha Xukuumadda.
3. Waqtiga waydiimuhu Kama badnaan karaan 3 saacadood haddii aanu guddoomiyuhu u ogolaan waqti intaas ka badan, taas oo Guddoomiyuhu xaq u leeyahay.
4. Guddoomiyuhu wuu u yeedhi karaa Wasiirka ama Madaxda kale maalmo kale haddii ay ugu dhamaan waydo hal maalin.
5. Marka ay Golaha yimaadaan wasiirada, madaxda kale iyo kaaliyayaashoodu waxa ay fadhiisanayaan madasha loogu talo galay.
6. Mudanayaashu waxa ay waydiin karaan wasiirka/madaxda kale su'aal kasta oo ay u arkaan in ay khusayso shaqadiisa.
7. Haddii ay su'aashu qoraal tahay mudanuhu waxa uu qoraalkiisa u gudbinayaa xoghaynta taas oo iyana u gudbin doonta Guddoomiyaha Golaha ka dibna loo gudbin doono wasiirka/madaxda kale marka uu Guddoomiyuhu uu go'aansado in su'aasha la aqbali karo
8. Guddoomiyaha Goluhu waxa uu u diidi karaa su'aasha mudanaha haduu arko in ay tahay: -

b. Mid aan la fahmayn.

t. Wasiirka/madaxda kale hore loo waydiiyey oo uu ka jawaabay

j. Duraysa Shaqsiyada Wasiirka/madaxda kale

x. Mid khatar ama dhib u keeni karta kiis maxakamad ku jira

kh. Wasiirka waxaa ku waajiba ah inuu ka jawaabo su'aalaha uu mudanuhu waydiiyey, Guddomiyuhuna ogalaaday.

d. Su'aalo dheeraad ah oo ka dhalatay jawaabaha wasiirka/madaxda kale mudanuhu wuu weydiin karaa.

r. Guddoomiyaha waxaa ku waajiba in haddii uu wasiirku ka jawaabi waayo ama uu ka war wareego jawaabta su'aasha inuu ku cel-celiyo su'aasha ilaa iyo inta uu ka bixinaayo Jawaabta dhabta ah ee uu u baahan yahay mudanuhu.

s. Hadii uu wasiirku ka jawaabi waayo su'aasha waxaa ku waajiba ah in Guddoomiyuhu uu ku soo celiyo mawduuca ama su'aasha.

## Qodobka 29aad
## Amniga Golaha Wakiilada

1. Dhawrista nabad-gelyada Golaha waxaa u xilsaaran Guddoomiyaha Golaha oo markii loo baahdo adeegsan kara ciidanka booliska ama hawl wadeennada nabad-gelyadda.

2. Waxaa reeban in qofna la soo galo hub xarunta iyo madasha fadhiga Golaha Wakiilada ama xafiisyada Golaha qofkii la soo gala waxaa laga qaadayaa talaabo sharciga waafaqsan.

   b. Hadii uu yahay mudane, waxa laga qaadayaa hubka oo keliya si edebi.

   t. Haddii uu yahay qof aan ka mid ahayn mudanayaasha Golaha waa in hubka laga qaado lana xidho.

3. Ciidamadda nabad-gelyadu ma soo geli karaan dhamaan dhulka uu ku fadhiyo Goluhu, kuwaas oo ay ka mid yihiin madasha fadhiga iyo xafiisyada Golaha Wakiilada hadaanu Guddoomiyuhu dalban marka laga reebo kuwo amniga Golaha sugaya.

4. Ciidamadda sugaya amniga Goluhu ma soo geli karaan fadhiga Golaha haddii aanay ogolaansho ka helin Guddoomiyaha.

5. Fadhiyada caadiga ee Goluhu waa kuwo dadweynaha, martida kale saxaafadda u furan.

6. Cid kasta oo loo ogolaado in ay soo galaan Golaha oo aan ahayn madaxda sar-sare ee dawlada, ciidamadda nabadgelyadu ee Goluhu way baadhayaan waxa ay sitaan iyo jidhkoodaba.

7. Waxaa ka reeban in lala soo galo xarunta Golaha gaadiidka marka laga reebo gaadiidka mudanayaasha iyo madaxda sar-sare ee dawlada iyo Hay'addaha.
8. Xubnaha Golaha iyo goob joogayaashu waa inay demiyaan moobilada (Telefoonada Gacanta) iyo qalab kasta oo carqaladayn kara ismaqalka fadhiga Golaha, mana bannaana in lagu cabbo sigaar, laguna cuno qaad ama cunto.

## Qodobka 30aad
## Kaydinta & Xafidaadda Hadal-qoraalka Kalfadhiyada Golaha

1. Hadal qoraalka (Minutes) fadhiyada Golaha waxaa ka masuul ah Xoghayha Guud waxaana diyaarinaya waaxda hadal qoraalka (HANSARD).
2. Hadal qoraalada fadhiga Golaha waxa wada saxeexaya Agaasimaha Waaxda hadal qoraalka iyo xoghayaha Guud ee Golaha si ay u xaqiijiyaan in hadal qoraalku saxan-yahay.
3. Hadal qoraalada waxa lagu kaydinayaa xusuus dhawrka Golaha.
4. Hadal qoraalada Golaha waxaa lagu xusayaa: -

   b. Tirsiga Fadhiga, Kalfadhiga Golaha iyo taariikhda
   t. Waqtiga iyo goobta fadhiga lagu qabtay
   j. Cidda guddoominaysay fadhiga
   x. Xubnaha ka soo qayb galay fadhiga iyo xubnaha maqan ee fasax qaatay
   kh. Xubnaha maqan ee aan fasaxa qaadan
   d Ajendaha maalintaas
   r. Soo koobid arrimaha laga hadlay iyo go'aamada lagu qaatay fadhiga.
   s. Waqtiga la xidhay fadhiga.
   sh. Go'aamada Guddoomiyaha ee la xidhiidha hab-raaca ogolaashaha soo jeedimada inta uu fadhigu socday.
   dh. Magacyada Mudanaayasha hadlay iyo doodoodda.

5. Duubista codka ama muuqaalka waxaa loola jeedaa dhamaan duubista waxa laga yidhaahdo fadhiyada Golaha iyo kuwa Guddiyadaba waxaana lagu kaydinaya xusuus dhawrka.
6. Gabo-gabada fadhi kasta, hadal qoraalada, kuwa la duubay muuqaal ahaan iyo cod ahaan waxa lagu kaydinayaa bogga Internetka ee Golaha si dadweynuhu ula socdaan shaqo maalmeedka Golaha.

**Qodobka 31aad**
**Xushmada Istaaga Golaha**

1. Mudanayaashu iyagoo xushmaynaya waxay u istaagayaan madaxda hoos ku qoran marka ay soo galaan fadhiga Golaha:-
   b. Madaxweynaha Jamuhuuriyadda Somaliland.
   t. Madaxweyne-xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland**.**

**Qodobka 32aad**
**Nidaamka Fadhiyada Golaha**

1. Marka la fadhiyo Golaha waxa xubnaha Golaha hortooda Fadhiisanaya Guddoomiyaha oo ay labada dhinac ka fadhiyaan G/xigeenadiisa iyo ciddii kale ee Guddoomiyuhu u ogolaado.
2. Xoghayaha Guud, ku xigeenkiisa iyo lataliye-yaashu waxay fadhiisanayaan meel ka hoosaysa halka shir-gudoonku fadhiyo.
3. Masuuliyiinta Qaranku waxay fadhiisanayaan dhanka midigta ee Guddoomiye-ku- xigeenka 1aad fadhiyo.
4. Hadal qoraalada Goluhu waxay fadhiisanayaan, mudaneyaasha hortooda oo xaga hoose ah.

## CUTUBKA 7_AAD
## HABKA ANSIXINTA XEERARKA

**Qodobka 33aad**
**Soo Bandhigida Mashruuc Sharci**

1. Sida ku cad qodobka 74aad ee Dastuurka, mashruuc sharci wuxu ka soo unkami karaa saddex meelood oo kala ah:
   b) Golaha xukuumadda.
   t) Ugu yaraan 11 Xubnood oo ka tirsan Golaha wakiilada.
   j) Muwaadiniin leh xaqa codbixinta tiradooduna aanay ka yarayn shan kun (5000) oo qof, oo la xaqiijiyey muwaadinimadoodda waxaana ka reeban mashruuc qaanuun maliyadeed.

2. Mashruuc-sharci loo soo gudbiyay si waaafqsan faqrada hore, waxaa loo raacayaa habka xeer-dejinta si la mid ah xeerarka kale.

## Qodobka 34aad
## Habka Mashruuc Sharci Marayo

1. Mashruuc sharciga uu curiyo Golaha xukuumadu waa in Golaha Wasiiradu ansixiyaan, madaxweynuhuna digreeto ugu soo gudbiyo Golaha Wakiilada.
2. In mashruuc sharciga ay la socoto warbixin faah-faahsan oo muujinaysa siyaasadda uu xambaarsan yahay mashruuc sharcigu
3. In soo gudbinta mashruuc sharciga lagu muujiyo inay xukuumaddu u aragto baahidiisa degdega ah iyo in kale.
4. Mashruuc sharci kasta oo Golaha loo soo gudbiyaa wuxuu marayaa habkan: -

   B. Waa in mashruuc sharci kasta oo Golaha Xukuumadu soo gudbiso laga hor akhriyaa wareegtada madaxweynuhu ku soo gudbiyey loona qaybiyaa nuqulada mashruuca sharciga mudanayaasha.

   T. Goluhu waxa uu u yeedhayaa wasaaradda, komishanka, Guddida ama hay'adda uu mashruuc sharcigu khuseeyo si ay Golaha warbixin uga siiyaan baahida keentay in la curiyo mashruuc sharcigan.

   J. Guddoomiyuhu wuxuu u gudbinayaa Guddida Golaha Wakiilada ee uu khuseeyo hawsha xeerkani waana in ay Golaha ku soo celisaa Warbixin ku saabsan xeerka muddo aan ka badnayn laba todobaad (14 Maalmood).

   X. Marka Guddida loo dhiibay mashruuc sharciga Golaha ay ka hor akhrido warbixinta xeerka oo tilmaamaysa aragtiyaha doodda mudanayaasha iyo go'aanka guddida iyo talo bixintooda, waxa mudanayaasha loo fasaxayaa ka doodista akhriska kowaad.

   KH. Doodu marka ay dhamaato, waxa waaxda hadal qoraalku soo diyaarinaysaa hadal-qoraalka doodda mudanayaasha ee mashruuc sharcigaas

   D. Xoghayaha Guud, lataliyaha sharciga iyo waaxda hadal qoraalku waxa ay qabyo qoraalka mashruuc sharciga ku soo dari doonaan soo jeedimaha helay taageerada ee mudanayaasha, waxaana mar kale loo qaybin doonaa mudanayaasha si ay ugu codeeyaan.

5. Mudanayaashu waxay soo jeedin karaan:

   b) In akhris 2aad Goluhu ka yeesho mashruuc sharciga waxaana Goluhu ku aqbalayaa cod hal dheeri ah

   t) In loo saaro mashruuca sharciga guddi gaar ah oo dib u eegis ku soo sameysa hal todobaad gudahood, waxaana Goluhu ku aqbalayaa soo jeedinta cod hal dheeri ah.

6. Mashruuc sharci kasta oo Goluhu ku ansixiyey cod aqlabiyad ah, oo aan ahayn kuwa maaliyadeed, waxaa loo gudbinayaa Golaha Guurtida.
7. Mashruuc sharci kasta oo Goluhu u gudbiyo Golaha Guurtida waa in ku soo celiyaan bil gudaheed, haddii kale waxa ku ansax noqonayaa sidii markii hore Goluhu ku ansixiyey waxaana toos loogu gudbinayaa madaxweynaha.
8. Mashruuc Sharci kasta marka uu ka soo noqdo Golaha Guurtida, waxa loo qaybinayaa mudanayaasha Golaha wakiilada.
9. Haddii Golaha Guurtida aanay wax-ka bedel ku sameyn dhamaan qodobada qabyo qoraal mashruuc sharciga Golaha wakiiladu u gudbiyey Madaxweynaha ayaa toos loogu gudbinaya.
10. Haddii qodobada mashruuc-sharciga ka soo noqday Golaha guurtida qaarkood waxka-beddel iyo kaabis ay ku sameeyaan waa in mudanayaasha ka dooddaan u codeeyaan qodobada wax laga bedelay ama lagu kaabay, waxaana mudanayaasha u bannaan in ay ku raacaan ama ku diidan xilliga codaynta.
11. Xeerka lagu ansixiyay si waafaqsan faqradda hore (10'aad) waxaa toos loogu gudbinayaa madaxweynaha.
12. Qodobada mashruuc sharciga ka soo noqday Golaha Guurtida ee wax ka bedelka iyo kaabista ay ku sameeyeen waxa Goluhu gelinayaan codeyn ah in ay ku raacaan wax ka bedelka iyo kaabista iyo inay diidaan.
13. Haddii ay ku raacaan Golaha Guurtida waxa ansax noqonaysa sida Golaha Guurtidu soo jeediyay.
14. Haddii Goluhu diido waxa ka bedelka iyo kaabista ay soo jeediyay Golaha Guurtidu waxa ansax noqonaysa sidii hore ee Golaha wakiilada ku ansixiyey.
15. Mashruuc sharci kasta oo Goluhu ansixiyo waxa saxeexaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud waxaana loo gudbinayaa Madaxweynaha si uu u saxeexo.
16. Nuqulka xeerka ee Golaha ka baxaya una gudbaya waxa waajib ah inuu noqdo kii Goluhu u codeeyey.
17. Mashruuc sharci kasta oo Golaha Wakiiladu u gudbiyo Madaxweynaha waa inuu ku saxeexaa 21 maalmood gudahood haddii aanu baarlamaanka dib ugu soo celin.
18. Haddii madaxweynuhu aanu ku saxeexin saddex (3) todobaad gudahood ama aanu ku soo celin baarlamaanka, mashruuc sharcigaasi sidaas ayuu ku

noqonayaa xeer dhaqangal ah, waxa saxeexaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada, waxaana faafinaya Golaha Wakiilada

19. Saxeexa Madaxweynaha Ka dib mashruuc sharci kastaa wuxuu noqonayaa dhaqangal waana in uu ku soo baxo faafinta rasmiga (Official Gazette)

## Qodobka 35aad
## Heerka Guddiyada Golaha (Committee Stage)

Guddida Golaha ee loo xil-saaray qabyo qoraalka mashruuc sharci waxay:-

B. Kulan xogwaraysi ah la yeelan karaan hay'addii uu ka soo unkamay mashruuc sharcigu, haddii ay u baahdaan

T. Waxay qaban karaan kulano la-tashi ama dhegeysi dadweyne, gaar ahaan qeybaha bulshada ee mashruuc sharcigu si gaar ah u saamaynta ugu yeelan karo ama kuwa si gaar ah u danaynaya, haddii ay la habboonaato.

J. Waxay adeegsan karaan la-taliye sharci, khabiir ama aqoon yahan waayo-aragnimo iyo aqoon gaar ah u leh mawduuca mashruuca sharciga, haddii lagama maarmaan u arkaan.

## Qodobka 36aad
## Waajibaadka Guddi Hoosaadka Golaha ee habraaca Mashruuc Sharci

Waajibaadka Guddida waxa ka mid ah:

1. Inay hubiyaan in mashruuc sharcigu waafaqsan yahay Dastuurka iyagoo kala tashanaya La-taliyaha sharciga.
2. Inay hubiyaan in mashruuc sharcigu si buuxda uga turjumayo siyaasadda ku lifaaqan iyo in lagu gaadhi karo ujeeddooyinka looga dan leeyahay.
3. Inay hubiyaan inaan mashruuc sharcigu sina u xadidayn waxna ugu dhimayn xorriyaadka iyo xuquuqda asaasiga ah ee muwaaddinka.
4. Inay qiimeeyaan saamaynta bulsho-dhaqaale, mid togan iyo mid tabanba iyo mid deegaanba. ee mashruuc sharcigu ku yeelan karo bulshada.
5. Inay hubiyaan in qabyo qoraalka mashruuc sharcigu u baahan yahay wax-ka bedel iyo kaabis, marka la eego qaab-dhismeedkiisa, dhammaystirnimadiisa, afka uu ku qoran yahay, iyo gol-daloolooyinka kale ee ka muuqan kara.
6. Guddidu talo soo jeedintooda wax-ka bedel, kaabis iyo sixitaanba waxay ku keenayaan lifaaq.

7. Guddidu waxay warbixintoodda iyo lifaaqa talo soo jeedintoodda mashruuc sharciga ka hor akhriyayaan Gole weynaha.
8. Haddii guddidu ku soo dhammays-tiri waayaan muddadii loo qabtay, waxay Guddoomiyaha Golaha ka codsan karaan in loo kordhiyo muddo aan ka badnayn hal todobaad (7 maalmood).
9. Haddii mar kale Guddidu ku soo dhammayn waayo hawsha mashruuc sharciga muddadii loo cayimay, Guddoomiyuhu isagoo lataliyaha sharciga kala tashaynaya wuxuu xaq u leeyahay:
   - b) Inuu muddo-kordhin kale oo leh waqti cayiman siiyo guddida
   - t) Inuu guddi kale u wareejiyo mashruuc sharciga
   - j) Inuu guddi gaar ah u saaro mashruuc sharciga
   - x) Inuu dood toos u geliyo mashruuc sharciga.

## Qodobka 37aad

## Doodda Gole Weynaha ee mashruuc sharci

1. Doodda Gole Weynaha waxa saldhig u ah:
   - B. Siyaasadda xeerka ee xukuumaddda u soo gudbisey.
   - T. Qabyo-qoraalka mashruuc sharciga
   - J. Talo-bixinta Guddida
   - X. Xogta ay soo helaan xildhibaanadu.
2. Doodda mashruuc sharci:
   - b. Waxay u furan tahay mudanayaasha Golaha oo dhan, marka laga reebo Gudidii keentay.
   - t. Mudane kasta oo dood ka qayb-geleyaa wuxu xaq u leeyahay muddo aan ka badnayn shan iyo labaatan (25) daqiiqo.
3. Mudanaha waxa waajib ah inuu dooddiisa ku muujiyo:
   - b. Qodobada uu mashruuc sharciga ama qaybo ka mid ah ku diiddan yahay ama ku durayo;
   - t. Qodobada mashruuc sharciga ka dhiman ama uu doonayo in lagu daro;
   - j. Qodobada uu doonayo in laga bedelo qaabka ay u qoran yihiin
   - x. Afka uu ku qoran yahay iyo wixii adkaynaya fahamkiisa.
   - kh. Xidhiidhka mashruuc sharcigu la yeelanayo xeerarka kale ee dhaqan galka ah ee JSL.
4. Doodda Golaha waxa ka soo bixi kara:
   - b. In Goluhu cod aqlabiyad ah ku ansixiyo mashruuc sharciga.

t. In Goluhu cod aqlabiyad ah ku laalo ama diido mashruuc sharciga
j. In Goluhu akris labaad ama wareeg labaad geliyo mashruuc sharciga
x. In Goluhu guddi gaar ah (adhoc committee) u saaro mashruuc sharciga

5. Haddii Goluhu laalo ama diido halkaas ayuu ku dhimanayaa.
6. Haddii Goluhu isku raaco in akhris labaad lagu celiyo mashruuc sharciga, waxa bannaan:

   b. In lagu celiyo Guddidii hore.
   t. In loo wareejiyo Guddi kale
   j. In loo saaro Guddi gaar ah.
   x. In dood toos loo geliyo.

## Qodobka 38aad
## Akhriska 2aad ee mashruuc sharci

1. Guddida loo xil saaray akhriska 2aad:

   b. Waxay wax-ka beddel, kaabis iyo dib-u-qoris ku sameyn kartaa qabyo qoraalka mashruuc sharciga waxayna ku keenayaan lifaaq.
   t. Waxay muddo cayiman oo aan ka badnaan karin hal toddobaad gudaheed, ku soo celinayaan Golaha warbixintooda oo dhammays-tiran.
   j. Guddidu waxay eegayaan hadal-qoraalka doodda mudanayaasha, iyada oo tixgelin lama dhaafaan ah siinaya dhalliilaha, soo jeedimaha, iyo tilmaamaha ay muujiyeen in ka badan saddex mudane.
   x. Haddii aanay mudanayaal ka badani muujin wax ka soo horjeedda kuwaas.

2. Marka Golaha lagu soo celiyo qabyo qoraalka mashruuc sharciga, mar labaad ayaa dood la gelinayaa, waana loo codaynayaa.
3. Haddii Golaha Guurtidu mashruuc sharci Golaha Wakiiladu u gudbiyey ku soo diido saddex meeloodow laba meel (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha mashruuc sharcigaas waxa uu ansax ku noqon karaa oo keliya haddii Golaha Wakiiladu mar labaad ugu codeeyo saddex meeloodow laba meel (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha haddii kale mashruuc sharcigaasi wuu burayaa.
4. Haddii Golaha Guurtidu ku ansixin waayo mashruuc sharci Golaha wakiiladu u gudbiyey ama jawaab ka soo celin waayo muddo bil ah gudaheed, xeerkaasi sidiisa ayuu u ansaxayaa, waxana loo gudbinayaa madaxweynaha.

## Qodobka 39aad
## Xeerarka Madaxweynuhu Soo Celiyo

1. Madaweynaha, isaga oo adeegsanaya awoodda Dastuurku siiyey ee ku xusan Qodobka 77aad faqradiis 5aad wuxuu Golaha ku soo celin karaa xeerarka ay ansixiyeen Golayaasha xeerdejintu, haddii uu arko inuu qodob ama qodobo Dastuurka ka soo horjeedaa ku jiraan.
2. Haddii ay xeer Golayaasha xeer-dejintu ku ansixyeen aqlabiyad gaadhaysa ama ka badan saddex meeloodow laba meel (2/3), Madaxweynuhu xeerkaas ma soo celin karo.
3. Madaxwenuhu haddii uu soo celiyo xeer waxa waajib ah inuu soo sheego ama ku muujiyo qoraal ahaan qodobada uu diiddan yahay iyo sababaha uu ku diiddan yahay oo faah-faahsan.
4. Xeerka madaxweynuhu soo celiyo waxa la gelinayaa dood ku kooban qodobada uu wax ka soo bedelay ama diiday madaxweynuhu.
5. Haddii Goluhu ku qanci waayo sababaha diidmada Madaxweynaha, wuxu xeerka ku ansixinayaa aqlabiyad aan ka yarayn saddex meeloodow laba meel (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha marka laga reebo xubnaha bannaanaanshahooda la baahiyey.
6. Tirada codka ansixintu (ogolaanshaha) wuxuu ku ansaxayaa cod hal dheeri ah, waxaana Goluhu ku diidayaa saddex meeloodow laba meel (2/3) wax-ka bedelka iyo kaabista Madaxweynaha isla markaana waxa dhaqangal noqonaya xeerkii hore ee dhaqangalka ahaa.

## Qodobka 40aad
## Habka dhaqan gelinta mashruuc sharci la o golaaday

Xeer wuxuu dhaqan-gal noqonaayaa marka uu maro habraaca Xeerdejinta si waafaqsan Dastuurka madaxweynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

## Qodobka 41aad
## Mashruuc Sharciyadda La diiday

Haddii uu Golaha wakiiladu diido mashruuc sharci laguma soo celinayo Golaha muddo Shan iyo afartan (45) maalmood ah laga bilaabo maalinta la diiday.

## Qodobka 42aad

## Mooshinada (Motions)

## Dabeecadda Guud Ee Mooshinada (Motions)

1. Mudanayaashu waxay xaq u leeyihiin inay soo qoraan Codsi Mooshin waxaanay ku soo hagaajinayaan Xoghayaha Guud.
2. Ma dhici karto doodda mudanayaasha ee ku saabsan arrrin ama hawl kasta mooshin mooyaane.
3. Guddoomiyuhu wuxuu xaadirinayaa magacyada mudanyaasha soo saxeexay mooshinka, mudanaha maqan marka la xaadiriyo waa laga tirtirayaa mooshinka waxaana loo qaadanayaa inuu qayb ka ahayn mooshinka.
4. Mooshinka waxa loo gudbinayaa La-taliyaha sharciga si uu u hubiyo in mooshinku waafaqsan yahay xeer hoosaadka iyo Dastuurka JSL.
5. Gudoomiyuhu marka uu helo jawaabta la taliyaha sharciga ee ansaxnimada mooshinka wuxuu mudeynayaasha wargelinayaa waqtiga la bilaabayo doodda mooshinka.
6. Ka hor intaan doodda mooshinka la bilaabin waxa nuxurka mooshinka Gole weynaha ka hor akhriyi doona mudane ka mid kuwa soo saxeexay mooshinka.
7. Hadaanu xeerkani si kale u dhigin mooshinku, doodda ka dib, wuxuu mooshinku ku ansaxayaa aqlabiyada fudud.
8. Tirada Xildhibaanada Mooshin keeni kartaa waa in aaney ka yaraan 11 xubnood hadaanu Xeerarku si kale u sheegin.

## Qodobka 43aad

## Habka Codsiga iyo Noocyada Mooshinada

1. Guud ahaan mudanayaashu waxay mooshin ka samayn karaan Arrin ku saabsan habka xil-gudashada Baarlamaanka (Subsidiary Motions) ama arrin/hawl ka baxsan xil gudashada Baarlamaanka (Substantive Motions) waana in codsiga lagu xusaa labadan kuu khuseeyo.
2. Lama Furi karo mooshin haddii arrinta uu ka hadlayo ama uu motionku khuseeyaa uu Goluhu ka Doodday isla Kal-fadhigaas.
3. Mudanayaashu waxay Mooshin u codsan karaan habkan: -

   b. Mooshin ku saabsan In fadhiga Golaha dib loo dhigo (Motion to Adjourn)

   t. Mooshin ku saabsan kaabis iyo wax ka bedel mashruuc sharci ama kaabis (motion to ammend)

j. Mooshin ku saabsan inay yimaadaan ama anshaxmariyaan mudanayaasha maqnaada (Motion for the Call of the House).

x. Motion ku saabsan in arrin ama xeer qabyo ah la tirtiro Motion Lay on The Table)

kh. Mooshin ku saabsan in dib loo dhigo Hawl qabyo ah (Motion to Postpone)

d. Mooshin ku Saabsan in la Joojiyo Dooda ama Su'aal/Qabyo ahayd in Cod loo qaado (Motion for Previews Question)

r. Mooshin ku Saabsaan in muddo gaaban lagu kordhiyo Fasax Kal-fadhi (Motion to Recess)

s. Mooshin ku Saabsan in Guddi gaar ah loo saaro daraasad, baadhitaan fal/dhacdo, dib u eegis ama dib u curin mashruuc sharci ama in talaabo arrin laga qaado (Motion to Refer or Commit).

sh. Mooshin ku Saabsan in uu Golahu Talaabo ka qaado, ama ku Saabsan Joojin Habdhaqanka Baarlamaanka ama soo jeedin Qodobo Xeer hoosaadka ka mida (Motion to Suspend the Rules).

**Qodobka 44aad**

**Wargelinta Mudanyaasha**

1. Inta kal-fadhigu socdo waxa Guddoomiyuhu mudanyaasha Golaha ku wargelinayaa: -

   b. Soo gudbinta warbixinta mashruuc sharciyada loo dhiibay Guddiyada Golaha
   t. Soo gudbinta warbixinta Guddiyada gaarka ah
   j. Mooshinada cusub
   x. Digreetooyinka ka yimaada Madaxweynaha
   kh. Xeerarka ka soo noqda Golaha Guurtida
   d. Xeerarka ka soo noqda Madaxweynaha
   r. Ansixinta masuuliyiinta Qaranka

## CUTUBKA 8_AAD
## GUDDIYADA

**Qodobka 45aad**

**Guddi Hoosaadyada Golaha**

1. Si uu u fuliyo waajibaadkiisa dastuuriga ah, Goluhu waxa uu yeelanayaa Guddi-hoosaadyo.
2. Tirada Guddiyada waxa qeexaya xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada

3. Xeer-hoosaadka ayaa qeexaya waajibaadka Guddiyada iyo tirada Guddi kasta
4. Waxaa bannaan in Guddi ay arrin khaas ah oo leh waqti cayiman awgeed ay ku darsan karto xildhibaan aan Guddida ka mid ahayn, xildhibaan-kaasi waxa u kala qayb geli karaa fadhiyada Guddida laakiin malaha xuquuqda cod bixinta ee arrimaha ay Guddidu go'aan ka gaadhayso.

**Qodobka 46aad**

**Waajibaadka Shaqo ee Gudiyadda Golaha Wakiiladda**

Waajibaadka shaqo ee Guddiyada Golaha Wakiilada waxay noqonayaan sidan:

1. In ay fuliyaan shaqo kasta oo Golaha Wakiiladu u xilsaaro
2. In ay darsaan, abuuraan, ka doodaan, kana talo bixiyaan mashruucyadda sharci ee la hor-keeno Golaha Wakiilada.
3. In ay Golaha Wakiilada u soo jeediyaan mashruucyo sharci oo qabyo ah ama qaraaro qabyo ah oo ku saabsan wax-yaabaha ay shaqadoodo tahay.
4. Inay Golaha usoo jeediyaan sharciyo qabyo ah oo ay tahay in xukuumadda faraan in ay u soo gudbiso.
5. In ay talo siyaan Wasaarada maaliyadda ku saabsan mudnaanta miisaniyadeed ee wasarada guddiyadda shaqadu kala dhaxayso.
6. La socodka iyo dabo-galka maamulka xukuumadda iyo hay'adaha dawladda oo dhan isla markaana Golaha warbixin ku soo celiyaan.
7. In ay darsaan oo saxaan siyaasadda saamaynta ku leh wasaaradaha ay Gudiyada shaqadu ka dhaxayso (line ministers).
8. In ay ka talo bixiyaan ama cadeeyaan arrimaha Golaha loo soo gudbiyo.
9. In ay keenan doodo Golaha kuwaas oo ay shacabka faa'iido ugu jirto.
10. In ay kormeeraan, qiimeeyaana habka loo fulinaayo loona hirgelinaayo sharciyada iyo qorsheyaasha Xukuumadda iyo Hay'adaha.
11. In ay dib- u- eegis ku sameeyaan qorshaha kharashaadka waqtiga dhaw iyo kan fog ee hay'addaha ama wasaaradaha loo xilsaaray.
12. Inay kala qayb qaataan diyaarinta odoroska miisaaniyadda wasaaradaha iyo hay'addaha dawladda ee shaqada Guddidu khuseyso.
13. In ay sameeyaan dadaal kasta oo ay kula xidhiidhayaan kuna kas-banayaan bulshada rayidka ah.
14. In ay Golaha Wakiilada ku wargaliyaan shaqada hadba taala.

15. Guddiyada Goluhu waxay xaq u leeyihiin in Miisaaniyadda Golaha ay ku yeeshaan xuquuq Gunno-hawleed marka ay Guddidu qabanayso kulan-hawleed gaar ah.

## Qodobka 47aad
## Qaab-dhismeedka Guddi-hoosaadka

1. Guddi hoosaad kastaa ee Golaha Wakiiladdu waa in ay yeelataa GudDoomiye iyo GudDoomiye ku xigeen.
2. Gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxaa iska dhex dooranaya Guddida, waxaana doorashadu ku ansaxaysaa cod hal dheeeri ah marka guntanku (Qorum) buuxo.
3. Guddoomiyaha Guddida ayaa Guddoominaya shirarka Guddida, marka uu maqan yahayna waxa guddoominaya ku xigeenka.
4. Go'aanada iyo qoraalada Guddida waxa saxeexaya Guddoomiyaha.
5. Haddii Guddoomiyaha/ku-xigeenka Gudidaasi uu soo gudbiyo istiqaalad qoraal ah, haddii uu dhinto, haddii ay ku timado xil gudasho la'aan joogto ah, ama si joogta ah uu ka maqnaado kulamadda Guddida, Guddidu waxa uu arrinkaas ku wargalinayaa Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda ka dibna waxa ay dooranayaan Guddoomiye ama ku xigeen cusub.

## Qodobka 48aad
## Kulamada Guddi-hoosaadyada

1. Guddiyadu waa in ay si joogto ah u kulman ugu yaraan afar (4) jeer bishiiba.
2. Waxa bannaan in Guddi Hoosaadka Golaha ka mid ahi shiraan marka uu fadhiyada Goluhu Xidhan yahay haddii ay soo baxdo hawl aan looga maarmayn, waxaana isugu yeedhaaya Guddoomiyaha Guddida.
3. Guddi kulan kale ma yeelan karto marka uu Gole waynuhu furan yahay ilaa ay Guddoomiyaha Golaha Wakiilada fasax ka hesho.
4. Marka uu helo codsi ay ku saxeexan yihiin ugu yaraan saddex meelood (1/3) xubnaha Guddida, Guddoomiyuhu Guddidu waa in uu qabtaa kulan muddo ku siman toddoba (7) maalmood gudahood oo shaqo ah, iyadoo xubnaha Guddida lagu war-gelinaayo jiritaanka kulanka ugu yaraan 48 saacadood ka hor, sababta loo qabanayo kulan-kaasna waa in lagu cadeeyaa ajendaha.
5. Marka Guddoomiyuhu uu iclaamiyo kulan, waa in xoghayaha Guddidu uu dhammaan ogaysiiyaa Xubnaha kulan-kooda 24 sacadood ka hor kulanka isagoo ogaysiinaya wakhtiga, goobta iyo ajendaha shirka.

**Qodobka 49aad**

**Kulamada Xidhan ee Guddida**

1. Shirarka Guddiyadu waxay noqonayaan kuwa u furan dad-weynaha iyo Saxaafadaba marka laga reebo xilliyada laga doodaayo:

   b. Arrimo qarsoodi ah oo taabanaaya amniga dalka
   T. Warbixino muhiima oo Golaha khuseeya

2. Marka aqlibiyada Guddidu ay isku raacaan in Kulanku ahaado mid Xidhan.

**Qodobka 50aad**

**Ajendaha kulanka Guddida**

1. Guddoomiyaha Guddida isagoo la tashanaya Guddoomiye ku xigeenka waa in uu ku war-geliyaa xubnaha Guddida ajendaha kulanka, isagoo tixraacaaya qorshaha shaqo ee Guddida iyo kan Golaha Wakiilada.

**Qodobka 51aad**

**Shaqaalaha Guddiyada**

1. Golaha wakiiladu waa in uu u diyaariyaa Guddiyada, shaqaale maamul iyo mid farsamo.
2. Xoghayaha Guud ee Golaha ayaa ka masuul ah shaqaalaha maamulka ee Guddiyada.
3. Xogheymaha Guddiyada waxaa ku waajiba in ay duubaan cod iyo muuqaal ahaan dhamaan kulamada Guddiyada kuna kaydiyaan xusuus-dhawrka Golaha wakiilada, nuqulna waxa la siinayaa, Shirgudoonka iyo Guddoomiyaha gudidda.

**Qodobka 52aad**

**Tirada Guddi hoosaadyada Golaha**

1. Golaha Wakiiladu isaga oo xilkiisa u gudanaya si waafaqsan xeer-hoosaadka iyo Dastuurka wuxuu yeelanayaa Guddi-hoosaadyo Joogta ah iyo kuwo gaar ah, kuwaas oo ka koobnaan doona:-

   1. Guddida Joogtada ah iyo Anshaxa.
   2. Guddida Daba-galka iyo Ilalinta Hantida Qaranka
   3. Guddida Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga.
   4. Guddida Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga, Wax-soosaarka iyo Tamarta
   5. Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgelyada.

6. Guddida Siyaasadda Arrimaha Debedda, Qorshaynta, Is-kaashiga Caalamagi ah iyo Maalgashiga.
7. Guddida Arrimaha Bulshada
8. Guddida Hawlaha Golaha (Business Committee)
9. Guddida Garsoorka, Cadaaladda, Shuruucda iyo Xuquuqul Insaanka
10. Guddida hawlaha guud , Tiknoolajiyadda, Guryaynta iyo Gaadiidka
11. Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

2. Waxaa xubnaha Guddiyada xilka xulistooda iska leh Guddoomiyaha, isagoo tix-gelinaya aqoontooda cilmiyeed iyo waayo aragnimada ay xubnuhu u leeyihiin hawlaha loo xilsaaray.
3. Guddi hoosaad kasta waxa ay ka koobnaanaysa ugu yaraan shan (5) xubnood.
4. Guddida Joogtada iyo Anshaxu waxay ka koobnaan doontaa ugu yaraan saddex iyo toban xubnood (13).
5. Muddo xileedka Guddi kasta waa hal (1) sanno ugu yaraan.
6. Xubin sannadka gudihiisa waa laga bedeli karaa Guddi hoosaad iyada oo loo bedalayo Guddi hoosaad kale.

## Qodobka 53aad
## Guddi Hoosaadyada Gaarka ah

1. Goluhu wuxu yeelanayaa Guddiyo gaar ah (AD HOC COMMITTEE) waxayna jirayaan inta hawsha loo magacaabay socoto.
2. Guddiyada gaarka ah waxa xilka xulistooda iska leh Guddoomiyaha Golaha wakiilada.

## Qodobka 54aad
## Guddida Joogtada iyo Anshaxa

Guddida Joogtada ah iyo anshaxa waxay yeelaynaysaa waajibaadyada soosocda:-

1. Anshaxmarinta Mudanayaasha Golaha Wakiilada si waafaqsan Xeer-hoosaadka.
2. Inay sii wadaan hawlaha Goleweynaha inta fasaxa ku jiro,
3. Waxay awood u leeyiyhiin inay darsaan, qiimeeyaan, asbaabaha keeni karra in mudanuhu ama mudanayaashu ku waayaan xubinnimadooda si waafaqsan Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka.
4. Guddida joogtada ah waxay u xil saaran yihiin in ay dhegaystaan, go'aanna ka gaadhi karaan cabashooyinka shaqaalaha.

5. Guddida Joogtada ah waxay tiradoodu noqonaysaa ugu yaraan 13 mudane oo uu mid ka mid ahi leeyahay aqoon sharci.
6. Guddida joogtadu waxay go'aan ka gaadhaysaa cabashooyinka ay uga soo gudbiyaan mudanayaashu shir-gudoonka ama mudane kale waxana mudanaha la siinayaa xaal-marin ku habboon haddii gef caddaado.

## Qodobka 55aad

## Guddida Arimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca

Guddidu waxay yeelanaysaa awoodahan soo socda:

1. Gorfaynta iyo ka talo bixinta mashaariicda sharci ama Xeerarka la xidhiidha Nabad gelyada, Maamul daadejinta iyo guud ahaan amniga qaranka.
2. Soojeedinta talooyin la xidhiidha la socodka arrimaha gobolada iyo degmooyinka dalka
3. Soojeedinta iyo ka talo bixinta Masuuliyiinta loo magcaabo Wasaarada arimaha Gudaha iyo Gaashaandhigga.
4. La socodka arimaha ciidanka booliska iyo hay'addaha amniga
5. La socodka arimaha socdaalka iyo jinsiyada
6. La socodka qorshaha qaran ee maamulida amniga iyo xasilinta dalka.
7. Xogo-gaal unoqoshada iyo la socodka hawlaha doorashooyinka iyo kormeerida Komishanka doorashooyinka qaranka.
8. Xogo-gaal u noqoshada xaaladaha difaaca qaranka iyo xilliyada dagaalka
9. Hawlaha kale ee xeer u jideeyay.

## Qodobka 56aad

## Guddida Hawlaha Golaha (Business Committee)

1. Guddida Hawlaha Goluhu waxay ka koobnaan doontaa:
   - Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.
   - Labada Guddoomiye Ku xigeen
   - Dhamaan Guddoomiyayaasha Guddiyada Golaha
   - Xoghayaha Guud iyo ku xigeenkiisa
2. Gudoomiyaha Guddidan waxa uu noqon doonaa Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, hadii uu maqanyahay waxaa guddoomin doona Guddoomiye ku Xigeenka 1aad hadii uu isna maqan yahay Ku-xigeenka 2aad ee Golaha, Haddii uu maqan yahay Guddoomiyaha Guddida Joogtada ah.
3. Shaqooyinka Guddida Hawlahu waxay noqon doontaa:
   - Sameynta ajendaha kal-fadhi kasta ka hor inta aanu furmin kal-fadhigu.

- Sameynta qorshe hawleedka kal-fadhiga oo xiliyeysan (parliamentary session calender).
- Habaynta shaqada fadhi kasta ee Golaha.
- Siinta waqti dooddaha ku saabsan heerka mashruucyada Sharci iyo shaqooyinka kale.
- G'oaaminta qaabka shaqo ee hawlaha Golaha, marka laga reebo hawlaha u gaarka ah Guddi hoosaadyada iyo Guddoomiyaha Golaha.

4. Gudashada shaqooyinka kale ee Goluhu uu u xilsaaro.
5. Ka talo bixinta odoroska miisaaniyadda Golaha inta aan loo gudbin Wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 57aad

## Guddida Siyaasada Arrimaha Debedda, Iskaashiga Caalamiga Ah, Qorsheynta iyo Maalgashiga

Waajibaadka Guddida Waxaa ka mid ah:

1. Qiimaynta iyo u kuur-galida xaaladda siyaasadda arrimaha dibedda iyo xidhiidhka caalamiga ah iyo xeerarka la xidhiidha
2. U kuur-galidda dhammaan xidhiidhka caalamiga ah ee dawladda, sida dawladdaha, ururrada iwm.
3. Gor-faynta iyo qiimaynta Heshiisyada caalamiga ah ee keenaya saamaynta dhaqaale, amni iyo siyaasadeed ee ay dawladdu soo gashay Goluhuna ansixiyay
4. Curinta xeerarka la xidhiidha safaaradaha iyo qunsuliyadaha
5. La socodka xaaladaha amni, siyaasadeed ee Qurbajoogta & Qaxootiga dalka.
6. U yeedhista madaxda hay'adaha dalwadda ee shaqadoodu khusayso
7. Soojeedinta ansixinta Mas'uuliyiinta loo magacaabo Wasaaradda arrimaha Dibedda iyo Qorshaynta
8. Hawlaha kale ee xeer u jideeyay.

## Qodobka 58aad

## Guddida Arrimaha Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamarta,

Guddidu waxay yeelanaysaa waajibaadyadan soo socda:

1. Gorfaynta, curinta, dibu-eegista iyo ka tala bixinta masharaaciida-sharci ama xerarka la xidhiidha hawshooda iyo waajibaadkooda.

2. Ku kor joogtanyta xukuumadda siyaasaddaha la xidhiidha hawsha Guddida iyo hirgalinta xeerarka gaar ahaan hay'addaha ay shaqadoodu khusayso.
3. La socodka iyo qiimaynta suuqyada iibka ee wax soo-saarka dalka ama guud ahaan khayraadka dabiiciga iyo tamarta.
4. Xaqiijinta iyo kor-joogtaynta hirgalinta siyaasaddaha xukuumadda iyo hirgalinta xeerarka la xidhiidha deegaanka iyo duur-joogta.
5. Qiimaynta iyo xog-ogaal u noqoshada qorshayaasha horumarinta ee xukuumadda.
6. Kor joogtaynta xukuumadda ee arrimaha la xidhiidha heshiisyada Shidaalka, macdanta & biyaha ee ay dawladdu gashay ama u xil saaran tahay.
7. U yeedhista mas'uuliyiinta hawshoodu khusayso.
8. Soojeedinta ansixinta mas'uuliyiinta loo magacaabo hay'adaha ay khusaydo.
9. Wixii kale ee xeer u jideeyay.

## Qodobka 59aad

## Guddida Garsoorka, Cadaaladda, Shuruucda Iyo Xuquuqda Aadanaha

Waajibaadka Guddida waxaa ka mida ah:

1. Dejinta iyo kala talo bixinta shuruucda la xidhiidha hawshooda iyo waajibaadkooda
2. Xulista xubnaha Guddida cadaaladda ka galaya Golaha Wakiilada
3. daba galka dhaqan gelinta shuruucda Goluhu ansixiyey
4. La socodka xaaladda Xuquuqul Aadaha JSL iyo siinta war-bixino arrintan la xidhiidha Golaha Wakiilada.
5. La socodka nidaamka Garsoorka iyo Cadaaladda ee dalka
6. Kormeerka xaaladaha jeelasha iyo siinta warbixino Golaha Wakiilada

## Qodobka 60aad

## Guddida Ilaalinta Iyo Daryeelka Hantida Qaranka

Waajibaadka Guddida waxaa ka mida ah:

1. La socodka maamulka xukuumadda iyo hay'adaha dawladda ee madaxa bannaan, Wakaaladaha, iyo shirkadaha dawladda ee ay isku shaqada yihiin
2. Awoodaha Guddida Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranku waa sidan:-
   b. Curinta iyo Diyaarinta xeerar la xidhiidha Maaliyadda/Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka.
   t. Wax Ka beddelka iyo kaabis ku samaynta xeerarka ku saabsan ilaalinta iyo daryeelka hantida qaranka ee hoos yimaada awoodda Guddida.

j. Deraasada warbixin sannadeedka uu Golaha Wakiilada u soo gudbiyo Hanti-dhowrka Guud.
x. Dib u eegidda iyo talo ka bixinta warbixin sannadeedka/Xisaabaadka iyo Qoraalada uu Hanti-Dhawrka Guud u Soo gudbiyo Golaha.
Kh. Diyaarinta warbixin faah-faahsan oo ay ka diyaariyaan warbixinada uu Hanti-Dhawruhu uu soo gudbiyo Golaha una gudbiyaan fadhiyada Golaha.
d. Baadhitaan iyo kormeer joogta ah oo ay ku maraan dhammaan ilaha dhaqaalaha wadanka si ay u hubiyaan wax soo saarka goobahaas ugalana dagaalamaan musuqmaasaqa iwm.
r. U yeedhida Wasaaradaha iyo Hayaddaha Dawladda si ay wax uga waydiiyaan waxqabadkooda iyo gudashada xilkooda si waafaqsan qodobada 53aad Farqada 7aad ee Dastuurka Jamahuuriyada Somaliland.
s. In ay warbixin sannadeed ay ka soo diyaariso adeegsiga iyo Ilaalinta Hantida Qaranka una gudbiso Golaha Wakiilada si u uga soo saaro baaqyo iyo qaraaro ku saabsan Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka.
sh. In ay suurta geliso xeerarka lagu ilaalinayo daryeelka Hantida Qaranka.
dh. In ay qabtaan hawlaha kale ee uu ujideeyey Dastuurka iyo Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada

## Qodobka 61aad
## Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga

Shaqada Guddidani waxay noqon doontaa Sidan hoos ku qoran:

1. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xidhiidha hawshooda iyo waajibaadkooda
2. Waxay darsaysaa, kana baaraan degaysaa soo jeedinta xukuumadda ee ku aadan ku talagalka miisaaniyadda qaranka sannad kasta.
3. Waxay tixgelisaa hindiso sharciyeedyada uu Golaha u xilsaaro ee arimaha misaaniyadda iyo maaliyadda;
4. Waxay dib u eegaysaa siyaasadda lacageed ee xukuumadda JSL.
5. Waxay ka baaraan degaysaa kharash-miisaaniyadeedka hay'addaha iyo wakaaladaha iyo Wasaaradaha Dawaladda.
6. Waxay u kuurgalaysaa siyaasadda cashuuraha iyo dakhliga.
7. Waxay ka talo bixinaysaa odoroska miisaaniyad sanadeedka qaranka, warbixina ka jeedinayaa Gole weynaha.

## Qodobka 62aad

## Guddida Hawlaha Guud Iyo Gaadiidka, Guriyeynta iyo Tiknoolajiyadda

Waaajibaadka Guddidan waxaa ka mida:

1. Curinta iyo ka talo bixinta mashaariicda-sharci ee la xidhiidha Hawshooda iyo waajibaad-kooda
2. La socod xaaladda Guud ee hawlaha (public works) iyo Gaadiidka (transport).
3. Kor joogtaynayaan hirgalinta xeerarka ama siyaasaddaha la xidhiidha jidadka iyo gaadiidka
4. Soojeedinta warbixinta Gole weynaha xaaladda guud ee la xidhiidha hawlaha Guud iyo gaadiidka.
5. U kuur-galidda xaaladdaha isgaadhsiinta, tiknoolajiyadda iyo hirgalinta xeerarka la xidhiidha
6. Soojeedinta ansixinta Mas'uuliyiinta loo magacaabay hay'adda dawladeed ee shaqadoodu khusayso
7. U yeedhista mas'uuliyiinta ama madaxda dawladda ee ay shaqadoodu khusayo
8. Gudashada hawlaha kale ee xeer u jideeyay.

## Qodobka 63aad

## Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska

Guddidani waxay u xil saran tahay arrimahan soo socda

1. U kuur-gelidda guud ahaan ku dhaqanka shareecada islaamka iyo waajibka Xukuumadda ka saaran
2. Gorfaynta iyo dibu eegista mashaariicda-sharci ee la xidhiidha shareecada islaamka dhaqanka iyo qoysaska islaamka ah.
3. Waxay xidhiidh dhow la yeelanaysaa hay'addaha islaamiga ama hay'addaha arrimaha bulshada, iyo amniga ee dalka oo ay ugu horayso Wasaarada Diinta iyo Awqaafta
4. Soojeedinta ansixinta mas'uuliyiinta loo magacaabo hay'addaha dawladda ee shaqadoodu khusayso
5. U yeedhista cid kasta oo ay u aragto in ay xog ka heli karto la xidhiidha arrimaha shareecada islaamka iyo ku dhaqankeeda, dhaqanka iyo qoysaska islaamka ah
6. Gudashada hawlaha kale ee xeer u jideeyay.

## <u>Qodobka 64aad</u>
## <u>Guddida Arrimaha Bulshada</u>

Guddidu waxay u xil saaran tahay hawlahan soo socda:

1. U kuur-galidda iyo ka tala bixinta mashaariicda-sharci ee la xidhiidha hawshooda iyo waajibaadkooda
2. Xog-ogaal u noqoshada adeegyada caafimaad ee bulshada
3. Ku kor joogtaynta xukuumadda adeegyada guud ee waxbarashada.
4. Qiimaynta qorshayaasha horumarineed ee la xidhiidha dhallinyarada iyo ciyaaraha
5. Soojeedinta ansixinta mas'uuliyiinta loo soo magacaabo hay'addaha shaqadoodu khusayso
6. U yeedhista mas'uuliyiinta dawladda ee shaqadoodu khusayso
7. Wixii kale ee hawl ah ee xeer u jideeyey.

# CUTUBKA 9_AAD
# KORMEERIDA XUKUUMADA

## <u>Qodobka 65aad</u>
## <u>U yeedhidda Masuuliyiinta Qaranka</u>

1. Goluhu Wakiiladu waxa uu awood u leeyahay inuu u yeedho xubnaha Golaha Xukuumadda, Hay'addaheeda madaxa-bannaan, Wakaaladaheeda, Komishanada iyo Guddiyada qaranka si uu wax uga waydiiyo gudashada xilkooda, si waafaqsan Dastuurka
2. Guddiyada Golaha Wakiiladu waxay awood u leeyihiin in ay Wasiirka ama madaxda Hay'adaha Dawladda ama madaxda sare ee kale ee Qaranka ee hawshoodu khusayso, in ay u yeedhaan waxna ka waydiiyaan gudashada xilkooda.
3. Haddii wasiirka ama mas'uulka kale ee madaxda ka ah Hay'ad dawladeed ku iman waayo yeedhamada Guddida cudur daar la'aan, Guddoomiyaha ayaa mas'uulka Gole weynaha qoraal rasmi ah ugu yeedhaya,
4. Haddii mas'uulku ku iman waayo yeedhmada Guddoomiyaha, Gudddoomiyuhu wuxuu Gole weynaha u soo jeedinayaa in ay kalsoonida kala noqdaan mas'uulkaasi cod hal dheeri ah
5. Haddii Goluhu isku raaco in mas'uulkaasi kalsoonida Goluhu kala noqdo, Guddoomiyhu wuxuu madaxweynaha qoraal rasmi ah ku wareglinayaa in mas'uulkaasi gudan waayay xilkii Dastuuriga ahaa isla markaana shuruudihii lagu magacaabay ay bureen.

6. Haddii Xubin ama Xubno ka tirsan Golaha Wakiilada tagaan gobol ama degmo way u yeedhan karaan madaxda qaran ee Gobolkaa ama degmadaa ku sugan, si ay wax ugu weydiiyaan hawlaha qaran ee dalka u hayaan.

## Qodobka 66aad
## Maamulka Guud ee Golaha Wakiilada

1. Xilka maamulka guud iyo ka maaliyadeed ee Golaha waxa ka mas'uul ah Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.
2. Xoghayaha Guud waa masuulka ugu sareeya shaqaalaha Golaha kana kaaliya Gudoomiyaha hawlaha maamulka, maaliyadda, shirarka iyo shaqaalaha ee Golaha.
3. Xoghayaha Guud waxa uu ka amar qaadanyaa Guddoomiyaha Golaha.
4. Shaqaalaha Goluhu waxa hoos imanayaa kana amar qaadanayaan Xoghayaha Guud
5. Xoghayaha Guud waxa uu kormeeraya, qiimaynayana kana war bixinayaa shaqaalaha Golaha

## Qodobka 67aad
## Ku dhawaaqida Xaaladda Deg-dega ah

1. Golaha wakiiladu waxa uu ansixinayaa ama dheerayn karaa xaalada deg-dega ah si waafaqsan Dastuurka Qaranka.

## Qodobka 68ad
## Wax ka-bedelka Xeer Hoosaadka Golaha Wakiillada

1. Wax-ka bedelka Xeerhoosaadka Golaha Waxaa soojeedin-kara 1/3 tirada guud ee xubnaha Golaha
2. Gudoomiyaha ayaa Gole weynaha hor keeni doona soo jeedinta kama dambeysta mudo sadex maalmood gudahooda ah oo ka bilaamanta maalintii Guddoomiyaha loo soo gudbiyay.

## Qodobka 69aad
## Buuxinta Jagada Golaha Wakiilada

Haddii ay bannaanaato jago xubin ka mid ah Golaha Wakiilada waxa loo soo buuxinayaa si waafaqsan Xeerka Doorashooyinka Guud iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyaasha Ee Xeer Lr.91/2020. Golaha Wakiilada JSL

**Qodobka 70aad**
**Dhamaadka Mudada Golaha Wakiilada**

Mudadda Golaha Wakiiladu waxay dhamaanaysaa marka maxakamadda Sare ee JSL ansixiso doorashada xigta ee Golaha Wakiilada cusub sida ku xusan Qodobka 44aad ee Dastuurka Faqrada 1aad.

**Qodobka 71aad**
**Habka Loo Raacayo Kala dirista Golaha Wakiilada**

Talaabooyinka ku saabsan kala dirista Golaha, wuxuu Goluhu u igmanayaa oo wakiil uga noqonaya Guddida Garsoorka, Cadaaladda iyo Xuquuqul Insaanka iyo la taliyaha sharciga ee Golaha Wakiilada.

**Qodobka 72aad**
**Laalis**

1. Habraac-kasta oo Gole weynaha ama Guddiyadu umaraan xil gudashadoodda oo aan waafaqsanayn Xeer-hoosaadka waxa uu noqonayaa wax-kama jiraan.
2. Habraac-kasta oo jideynaya xil-gudashada Golaha iyo gudiyada waxaa lagu laaali karaa soojeedin Goleweynuhu ku aqbalay Go'aan Gole.

**Qodobka 73aad**
**Dhaqangalka Xeer-hoosaadka**

1. Xeer-hoosaadka waxaa saldhig u ah Dastuurka JSL, wixii aan waafaqsanayn waxa uu noqonayaa waxba kama jiraan.
2. Xeerhoosaadkan waxa uu dhaqan-gal ahaanayaa ilaa inta Golaha ka danbeeya (Golaha Cusub) ka samaysanayo Xeer-hoosaad cusub.
3. Xeer-hoosaadku wuxuu dhaqangal noqonayaa marka Golaha Wakiiladu Ansixiyo Gudoomiyuhuna saxeexo.

**Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**